# Socdaalkii Geerida Soomaaliya ilaa Yurub

***W/Q. Muxamad Idris Axmad***

***

**((Maaha Riwaayad beena ee waa sheeka dhaba oo dhacday. Qofka ay qisadu ku socoto waa mid ka mida kumanyaal Soomaaliya oo qaarna meelahaas ku dhinteen qaarna ilaahay sabata bixiyey.Waxyaabaha aad ku arki doonto waxaan usoo gudbiyey sida dadkii ay ku dhacday uga warameen..Waxaan ku leeyahay oo keliya waa inaan usoo gudbiyo qaab quruxsan intaan awoodo, laakiin asalkeeda aanan waxba ku kordhin.Waxaan rajaynayaa iney noqoto wax lagu cibra qaato. Laysna weydiiyo: Yaa Masuul ka ah dadkaasu iney dalkoodi ka bara kacaan, oo dariiqa geerida door bidaan?))**

***

Magacaygu waa **Cabdi**. Waxaan ahay nin Soomaaliya oo dhalinyara ah. Waxaan ku dhashay gobol ka mida gobolada Geyiga Soomaaliyeed ee xorta ah Sanadku markuu ahaa 1987. Waxaad halka ka garan kartaan inaan Adduunyadan indhaha ku kala qaaday iyadoo Qarankii Soomaaliyeed naf yari ku jirto oo uu sakaraatul mawtka laxawgiisi la rafanayo. Markii aan garaadsadeyna waxaan lasoo kulmay Dal burbursan oo aan Dawladi ka jirin. Ilaa waqti dhaw waxaan u haystey – welina in badan u haystaa – in dalka aan la kulmay weligiis sidaa aan ugu imi ahaan jirey, waayo wax ka duwan ma aanan arag, iimana sawirna, wax bandanna kama maqal wixii horay u jiri jirey. Waxaan filayaa Soomaalida maanta joogta ee facayga ahi iney sidaa u badan yihiin.




Baadiyaha Gobolkayaga markaan ku dhashay waxaa lay keenay magaalada degmada ah. Aabahay wuxuu igu daray dugsi Qur'aan. Kadibna Waxaanu nimi Magaalada Muqdishu 1998 anoo toban jirsadey. Magaalada Muqdishu ee dadka waaweyn qaarkood ka sheekayaan anigu ma arag mana suuraysan karo. Wexey ila tahay aniga sidaan ugu imi iney weligeed ahayd. Magaala burbursan, xaafadaha qaarkood aan la gelin, xabbaddu ay joogta tahay, cisbitaalla aan lahayn, wadooyinka bacaad ka buuxo, qashinkuna meel walba taallooyin yahay. Iskuulada ciyaalku tagaanna waa lacag, ma fahmi karo anigu inuu jiri jirey iskuul aan lacag ahayn. Ilaahay mahaddiis iskuulna waa la I geeyey, nasiib wanaagsan ayaan arrinkaa u yeeshay, waayo walaalahay badankood iyagoo 20 ka badan nasiibkaas ma helin. Qur'aankana walaalkay ayaa i baray oo kor ayaan ka qabtay kitaabka Qur'aanka 114 ka Suuradood Ilaahay mahaddiis, sidoo kalena waxaan ku ababay inaan Masaajidka ku xirmo anoo yar.

Dhallinyara badan oo aniga ila mid ah oo xaafadda degganayd wadooyin kala duwan ayey qaadeen, haba ugu badnaadeen iney maleeshiyaad u noqdaan kooxaha dagaalama. Dagaalladii socdey waxaan ka qayb ahaa oo keliya kuwii lagaga hortegayey gumaysigii Itoobiya ee dalka kusoo duuley dabayaaqadii 2006. Waqtiyadaas ayaan aniguna dhameeyey Dugsiga Sare. Waxaan isku deyey inaan helo deeq wax barasho, laakiin iima suurta gelin, ehelkayguna ma bixin Karin mid lacaga.




Bartamihii sannadkii 2007 ayaan usoo bokhoolay dalka Suudaan anigoo wax barasho raadinaya. Haddaan imi Magaalada Khartuum waxaan mudda yar ka dib helay Jaamacad ku taal Magaalada (Qadaarif ) Laakiin waxaa aad iigu adkaatay noloshii meeshaan kasoo saari lahaa. Ehela dibadda ii jirta oo xagga masaariifta nolosha iyo waxbarashada iga soo kaalmaysana ma lahayn. Qoyskayagu wuxuu wada jiraa dalka gudihiisa. Dhawr bilood ayaan la ciirsanaa noloshii anigoo Jaamacadda ku jira, markii dambana waan wadi kari waayey.

**DHALLINYARADA IYO DHOOFKA**

Dhallinyaradu wexey ku sheekaystaan kuna taamaan sidey dibadaha ugu dhoofi lahaayeen, gaar ahaan wadamada yurub oo annagu markaa aan u haysanno Jannadii Adduunka inaad gashay markaad cagaha soo dhigato! Wadooyinka tahriibka oo la marayana waxaa ku hilmaansiinaya markaad ku riyooto iney tahay safar yar oo rafaadba ha ahaatee raaxo ka dambayso. Waxaa kaloo dadka aad u sal kiciya, ninkii shalay meeshan kula joogey, oo gaajada kula qabey, oo bil ka dib Yurub taleefan kaaga soo diraya oo ku leh:

Hullo… Cabdi… weli ma meeshii afrika iyo kulaylkeedi ayaad joogtaa.. waxaan kaala hadlayaa Stockholm… Oslo.. Geneva.. Amsterdam!! markaa ayaa calooshu ku xanuuneysaa..oo Waxaad leedahay adiguna ka gaar. Midda kale dadka soo hadlayaa kuuma sheegayaan sida badan dhibaatooyinka ay lasoo kulmeen, ama wadada ay soo mareen cadaabkii yaalley..waqti uma hayaan ay kaaga sheekayn karaan si tifa tiran dadkii wadada ku dhintay, badda kuwii ku daatay, bahaluhu kuwey cuneen, iyo sida Ilaahay ku badbaadshey.. Sidaa darteed, wadadii dadku ku le’deen nafteedi ayaa kuwayaga kalena soo daba haynaa.. xitaa dhibtey la kulmeen sideedi ayaan anaguna usoo celineynaa.

Muddo haddaan hurdada ku laba gaddoomayey, talada isu geeynayey, riyada anoo hurda iyo anoo soo jeediba Yurub ku riyoonayey, waxaan go’aansadey inaan Wadada Tahriibka Cagta Saaro, Khartuumta aan joogo markaasna qorshaha ka bilaabo ilaa aan Yurub ku gaaro.

**BILAWGII QORSHAHA TAHRIIBKA!**

Waxaan bilaabay inaan raadiyo dadka ka shaqeeya tahriibka iyo qaababka aan arrinka ku heli karo. Waxaan soo ogaadey iney jiraan niman (Mukhalisiin) ah oo isku xiran, iyaguna kusii xiran (Maafiyo) Kala duwan oo xiriirsan ilaa iyo Suudaan, Liibiya, Xuduudaha iyo Magaalooyinka kala duwan, oo dadka halkaa ka daad gureeya, Khartuum ka qaada, xuduudaha dhaafiya, saxaaraha marsiiya, kadibna Liibiya magaalooyinkeeda waaweyn sida Bani Qaasi iyo Tripoli geeya, kadibna halkaa doon laga saaro ilaa xeebaha Talyaaniga, haddii Talyaaniga la gaarana Jannadii cagta u horraysa la saarayo! Laakiin Wadadan dheer iyo Saxaarahaan side lagu gooynayaa? Dhib ma leh, dad badan ayaa habeen iyo maalin mara, qofkii Ilaahay u qadarayna waa dhintaa, kii kalena waa gudbaa. Qof walbaana wixii Allah u qoray ayuu la kulmayaa.Dadka qaar ayaa 5 cisho ku gaara xuduuda liibiya, qaarna ilaa 7 cisho ama 10 ugu badnaan. Intaa ayaa laguu akhrinayaa marka ay ugu badantahay.

Laakiin cidina kaaga sheekayn mayso Khartuum ilaa xuduuda maxaa lala kulmaa, xagee la maraa, yaa ku wada, side laguula dhaqmayaa, heshiiska haddii lagaaga boxo ciirsi beel maxaa kuu tala ah, meel ma gaari kartaa, sahaydu hadey kaa dhamaato xagee wax ka heli kartaa, arrin aan la filanayn haddeey dhacdo side wax noqonayaan, haddii Liibya xuduudkeeda la gaaro maxaa lagala kulmaa, maafiyada tahriibku dadka side ula dhaqmaan, guryaha dadka lagu xirtay iyo dadka la kala gatay side ayey ku dhacdaa, qaabkee ku timaadaa, ma dhici kartaa in adigana lagu kala gato, dumarka in la kufsado, in sanada gurya lagu haysto amaba la kaxaysto oo la addoonsado. Waxaas oo dhan wax laga sheekayey si tafaasiil ah maahan. Sidaas darteed qofka wey la fududahay marka la yiraahdo: Waa tahriib, dhibaatooyin ayaa lala kulmaa, qofkii Ilaahay u qoroayna waa ku dhintaa, mar walba naftu mar ayey go'I lahayd, wuxuu is oranayaa: Hade awalba dhib iney tahay waad usoo diyaar garowdey ee ku nasiibso.

Asbuuc walba waxaa baxaya boqollaal, isla wadadii iyo dhibkii ayey marayaan, kan dambena kan hore war kama hayo, xitaa meel heblaaya iska jira, oo maafiyada dadka gadata halkaasey joogaane ka digtoonaada, oo meel heblaaya haddii gaari kaaga jabo, harraad ayaa loogu dhintaaye ogaada, wax haba yaraatee wacyigelin ahi ma jirto.

**SHABAKADA LUGTA LA GAL!**

Sidaas ayaan aniguna isugu soo tuuray wadada cadaabka iyo geerida ee Saxaaraha liibiya. Shabakada maafiyada tahriibintu waa Soomaali iyo Suudaan iyo Chad/Libyaan, isku xiran. Ragga madaxda ka ah shabakadaha waa badan yihiin. Laakiin qaar waaweyn ayaa ugu caansan, iyaguna wexey leeyihiin (mukhalisiin) (out reach) dadka usoo daba. Waxaa ku jira Soomaali xawaaladaha meelahaas (dadka) laga ganacsado jooga oo lacagaha u qabta maafiyada tahriibka, kuwaas oo macaamilkoodu kala duwan yahay, qaar aad moodeyso inaaney insaanba ahayn, wuxuushtana ka daran yihiin, naxariis darada, cadaabta iyo cadaadiska ay ku hayaan dadka la kala gadanayo.

**HESHIISKA HORE**

**Khartoum 20/5/2008**

Mid ka mida raga wax tahriibiya, kuwa ugu waaweyn Khartuum, oo Soomaali ah, oo nin Odaya ah, ayaa la ii geeyey. Wuxuu yiri: Adeer ma waxaad u baahantahay in Liibiya lagu geeyo? Waxaan ugu jawaabay: Haa adeer. Wuxuu yiri: Guri ayaa lagu geenayaa ilaa bixitaanka waqtigiisa. Waa guri u kireysan oo dadka tahriibaya lagu aruursho inta aaney bixin. Waa (Departure Lounge)! Waad cabbeysaa waad cuneysaa inta aad ka bexeyso, asbuuc walbana waxaa baxa koox. Lacagta lagaa qaadayo ilaa xuduuda Libya waa 500$ ilaa 600$. Dadka meeshaan lagu soo ururshey qaar ayaa (Mukhalisku) kasoo daayey xabsiyada Suudaan, si ay usii tahriibaan.

Dadka halkaa ku urursan wexey ka kooban yihiin rag iyo dumarba. Hay ahaanna wexey Wexey kasoo jeedaan Gobolada Waqooyi iyo Koonfur. Bariga shishe cidi kagama jirto. Intii walba oo isku cida ama isku gobola ama beela waa isku jicsin iyo isku fadhi. Waxaa loo sameeyaa, hoggaan qola walba lagala hadlo. Wexey isugu jiraan, mooryaan dagaaladii sokeeyey ama hoggaamiye kooxeedyadii u ahaan jirtey maleeshiyo, dad dhawrsan, dad faalka dhiga, dad tukada ama qur'aanka yaqaan. Luqada carabiga inta taqaan ama tacliinta lihi wey ku yartahay. Waxaan filayaa gruupkayga aniga ayaa Turjumaan u noqon doona.

**Khartoom ilaa Baadiyaha – Bilawgii Safarta**

Saacaddii la bixi lahaa ayaa soo dhowaatey, dadkuna lacagtii wey baxsheen. Waxaanu nahay 76 qof oo Soomaali ah, 9 ayaa dumara inta kalena (67) waa rag. Dumarka mid keliya ayaa la qabaa oo ninkeedii la socdaa. Caruur kooxda yada lama socoto. Dumarka oo da'doodu wexey u dhexeysaa 20 -30. Waa habla dhalinyara ah. Hal dumara ayaad moodaa iney da'aadda 40ka ku dhex jirto. Raggu waa wada dhalinyaro. Aniga oo hadda 20 jira iyo aynigayga. Wax 30ka gaarey wey ku yar yihiin. Ninka na tahriibinaya waa nin xariifa, Suudaanna ilaa xukuumadda si weyn looga yaqaan. Askarta iyo Saldhigyada dadka jooga oo dhammi wey yaqaananaan. Baabkiisa lama geli karo. Haddaad xisaabto lacagaha tahriibka waxaad ka xisaabisaa tusaale ahaan: 76 qof X 500$ = 38000 $. Asbuuciiba 50 ilaa 100 ayaa sidaa u baxaya. Waxaa ka dhex shaqeeysta sil salad isku xiraan ilaa Tripoli Liibiya. Laakiin dhibka aanaan ogeyn markaas oo gadaal nooga soo baxay waxa weeye, MUHARIB KASTA markuu gacanta kugu dhigo lacag cusub ayuu kaa rabaa, haddii kale meel ayuu kugu xiranayaa mana ka bexeysid ilaa aad bixiso! Sida xoolaha oo kale ayaa markaa naloo kala gadanayey sida aad arki doonto.

**FUULA GAARIGA!**

Habeenkii saq dhexe ayaa nala toosiyey, gaari caasiya ayaa nala kusoo guray ilaa nala keeno magaalada bannaankeeda, halkaas oo nala ku urursheY. Kadibna waxaa nala ku guray Gaari Loori ah oo weyn dhabarkiisa anagoo kaba loodsan. Meel naloo wado iyo dhinac adduun naga jiro ma naqaan. Rag iyo Dumar gaariga ayaa nalagu cayayuubay. Xagee naloo wadaa?

**FEKER!**

Gaarigu wadaduu cagta saaray, kadib markuu na sagootiyey (Atoorihii) tahriibka, dhinaca Khartuum, dabayla xagaa ayaa na garaacaya gaariga korkiisa, gidaarka dhigaha gaariga ayaan ku tiirsanahay, fekerka ayaa xoogaa I jiitey, waxaan is weydiiyey: Maxaa qadartu kuu qarineysaa oo kaa horreeya? Ilaa yurub side xaal noqon doonaa? Wadankee u gudbi doontaa? Shaqada aan heli doono, iyo reerkayagii oo aan qaarna baadiyi uga soo kacay qaarna Muqdisha oo dagaalla ka socdaan uga imi, sideen wax u tari doonaa.. Waxaan xasuustay hooyaday oo aan kasoo dhaqaaqay iyadoo ii baahan, aabahay oo da' sii noqonayey oo tuuladii mar walba intuu salaadda casar ka istaago dhahaya: Muslimow faataxada iisoo mara wiil aa iga maqane inuu ilaahay nabad ku geeyo.

Waxaan is maskaxdayda soo hormartay ardayda Suudaantaa oo dhulkooda ku nool, Dawladda haysta, Jaamacadda la siinayo, haba dhibbanaadaan laakiin fursooyin aanan haysan heli kara. Waxaan is iri: Adinka yaa dalkiini idiin diidey inaad ku noolaataan, inaad waalidiintiin la joogtaan, eheladiina ku dhex jirtaan. Yaa idin baday inaad qaxooti iyo Tahriib ahaataan, silican iyo saxariirkan martaan? Fekerkaas dheer anoo ku jira, gaariguna hawada cabbaayo, wadooyin qardajeexa oo aan dad iyo duunyo u dhoweyn marayo, ayaan ku soo baraarugay, iyadoo la leeyahay, subaxnimadii, kasoo dega, halkan ayaad degeysaan. Meeshu waa dhul cidla ah, geeda yar oo gaa gaaban ayaa ku yaal, ciid ayey u badantahay. Halkii ayaa la yiri ku data. Gaarigiina waa tegey. Hal nin oo dameer haysta ayaa meesha jooga, oo biyaha kusoo dhaamiya. Wax kale ma yaalaan.

***

Waxaan soo goobti saxaaraha ahayd ee dadka lagu ururin jirey Khartuum bannaankeeda. Waa meel cidla ah, saxaaraha ah, geedaha hoostooda dadka lagu daadiyo. Waxaad goglaneysaa maradaada, boorsadaadana waad barkaneysaa, cirkuna waa kuu furanyahay, dabayluhuna hadba dhinac ayey kaaga imaanayaan. Dadka intooda bandanna ciidda ayeey seexdaan. Halkaas ayaa baabuur kale loogu keenayaa oo ay usii ruqaansanayaan xagga xuduudda, iyadoo mar walba saan filayo ay (Muharibiintu) dhawrayaan wadada iyo sida xaalkeedu yahay. Sida caadadaa waa iney dadku maxadadan ka gudbaan maalin ama labo gudohood. Laakiin annagu sagaal cisho ayaan fadhinay. Hal mar ayaa wax la cunaa. Waa bariis qaxara oo basal (koosaar) looga dhigay, biyahana waa la helaa. Maalmahaas aad ayaan ula yaabbanayn bariis qalalan oo basal lagu qusaarayo. Laakiin wuxuu noo noqday maalmihii ka dambaysey sida hoteel (5 Star) ah oo aan la heli Karin.

**2 maalin wexey noqotay 9 cisho!**

Waxaa naloo sheegay markaanu khartuum kasoo baxnay meeshaas in dhaqsi nalooka qaadi doono maalin ama laba gudohood. Laakiin sagaal maalmood ayaan fadhiney oo dabayshu

dhinac walba naga geleysey. Waxa noogu daran wexey ahayd dabaysha iyo bacaadka. Waxaa dhici karta inaad seexato, kadibna aad soo kacdo adigoo daboolmay oo ciidu ku qarisay.

**Dadka meesha isugu yimi**

Dadka aanu socdaalka wadaagno waa dad kala duwan dhinac walba. Qaar waa mooryaan ahaan ama maleeshiyadii hoggaamiye kooxeedyada. Qaadka ayey cunaan, sigaarkana aad ayey u cabbaan, shaxda ayey ciyaaraan, maalintii. Salaadna ma tukadaan. Laakiin markii aad tiraahdo, walaalyaal salaadda tukada, qaar ayaa ku caynaya: Hooyadaa waxaa iyo waxaa..qaarna wexey leeyihiin daahir miihi, dharkuna daahir iima aha. Kuwa ugu fiicanna waa kuwa ku yiraahda ilaahay ha isoo hanuuniyo.

Qaarna faal ayey dhigayaan, sida mid ka mid ahaa kooxdayadaas, faal ayuu dhigay maalmo ka dib, wuxuuna yiri: gaari ayaa jabi doona dadna waxbaa gaaraya. Waa dhici karta male inuu ku dhisay waayo saxaarahaan gawaaridan oo kuwa wada fac weyn ahi iney jabayaan shaki kama taagna. Qaar ayaa meeshan isku shukaansanaya. Wiil dhalinyarada ka mida ayaa igu yiri: Gabadhan aanu isla tahriibeyno igu meheri! Waa muuqatey iney is shukaansanayeen. Waxaan ku idhi: sideen kuugu meheriyaa weligeedi iyo dadkeedi cidba kama haynee. Wexey yeeleen kadib ma garanayo, oo safarta hawsha badan ayaa nakala mashquulisay.

Kooxdayada oo dhan 76 qof waxaa dumar 9 oo keliya. Inta kale waa rag dhalinyaro u badan. Wexey u qaybsanyihiin dadkoo dhami in ka timi koonfur iyo in waqooyi ka timi. Goboladi Bari cidi kagama jirin. 27 wiil iyo gabar ayaa dhanka waqooyi ka socdey. Waxaa goobta loo Kala degey sidii loo wada socdey, ama isku raas loo ahaa, ama isku jicsin. Koox yariba meel ayey degtey. Salaadda 40% tukata. Dumarka ilaa 5 waa tukadaan. Raggatukada meel ayaan maalintii isku jamacsan jirney, subaxa iyo habeenkana nin walba meeshiisa. Ragga oo dhan da'doodu waa 20 -30 inta u dhexeysa. Dumarkuna sidoo kale, hal haweeney ayaad moodeysey iney afartanaadka gashay. Dumarka hal mid ayaa ninkeedu la socdaa, inta kalena waa wada tahriibayaan.

**AYAAMA KULUL**

Waxaa ninkii nasoo tahriibiyey ee Khartuum naga soo qaadey ku heshiiney in meeshan maalin ama 2 maalin aanu joogeyno, laakiin 9 maalmood ayaanu meeshan cidladaa fadhiney oo dabaylaha xagaagu na garaacayeen. Waxaa kaaga daran kulaylka oo darajada hawadu isku shareereyso 50 darajo. Laakiin qof walbaa wuxuu leeyahay, dhib ma leh, beri ayaa laga gudbayaa, Yurub ayaad tegeysaa, waxaana waad hilmaameysaa!

**Mukhaliskii ma argnaa?**

Markaan la hadalno maxaa naloo qaadi waayey, mukhaliskii khartuum ayuu ku mashquulsanyahay, jabhad ayaa jirta, jidka ayaa xun, mar ayuu noo yimi, raashin kiish boorasha iyo kiish basala ayuu noo keenay. Markii dambe oo aan soo bexeynana wuu nasoo sagootiyey.

**Wadadii Xuduudda Liibya ayaan ku jeedanaa:**

Barqadii ayaan 2 gaari oo looriyaal ah fuulnay, asizu iyo PJ luga badan. Bacaadkaa la dhex marayaa. Suudaan ayaa baabuurta wada. 2 Dareewal, 4 Kirishbooy, iyo (Samaani) oo ah batrooniga safarta wada, waana Sudani, Qandaraaska ninka soo qaatay oo kii soomaaliga ahaa kasoo qaatay. Meesha la marayaa waa qardajeex tahriiba. Wada gaari loogu tala galay maaha. Gawaaridu waa qanax aan meelna gaarayn. Hawadu waa kulushahay. Sidaa darteed xoogaa yar markii la socdaba waa la istaagayaa. Bir ayaa xun. Lug ayaa banjartay. Biyahaa kululaaday. Soo dega dhulka fariista. Maalintaas oo dhan ayaan soconey, habeenkii oo dhan ayaan tukubeyney, marna soco marna fariiso, Subaxdii dambe waa berkii ayaa la yiri ma dhaqaaqi karo. Ilaa 150 km ayaan soconey 24 saacadood. Guddi 3 soomaali ayaa soomaalidu leedahay oo kuwan kale la hadla.

**Gaarigii waa jabay:**

Markii aan meesha fariisannay, waxaan la hadalnay ninkii Suudaaniga ahaa ee (Tahriibk) wadey. Soomaalidii wexey tiri ninkii soomaaliga ahaa ee khartuum fadhiyey nala hadalsiiya, wey la hadleen, wuxuu yiri meeshiina jooga waan idiin imaanayaa. Raashinkii iyo biyihii waa yaraaday, dadkiina waa tabar yareeyey, meel dhul bannaana oo geeda aan lahayn, geedaha yarna caleen lahayn, bacaad, ayaa la yiri ilaa berri ayaan joogeynaa.

**Biyaha halla cabbiro!**

Habeenkaa meeshii ayaa la baryey, ciidaa layska seexday, waxba lama karsan. Waa 2 habeen iyo labadooda maalmood aan wax la cunin, wixii yaraa ee dadka jicsinka uga haray mooyee, taasoo 9kii cisho kusoo dhamaatay. biyaha waxaa la bilaabay in naloo cabbiro, koob yar ayaa nala siinayaa, caag yar oo nus liitarka ah ayaa dhexda laga goynayaa,rubuciis 25 mgr, ayaa subixii ayaa lagu siinayaa, ama wax ku karso ama cab, hadii shah kuu daran yahay shaah ku karso, hadii kale hal mar fuuqso, manta oo dhan biya dambe il saarimeysid ilaa berry subax. War saxaarihii aan 9ka maalmood fadhiney ayaaba noo roonaa, saa biyaha ayaanba heli jirney oo ninkii shaqaalaha ahaa ayaa Dameerka mar walba kusoo dhaamin jirey. Laakiin shaaha maxaad ku karsaneysaa? Ma maqal miyaa, qalabka jidkan wax lagu karsado.! Gasacadaha fuulka ama furutka laga dhamaystay ayaad shaaha ku karsaneysaa, kuna cabbeysaa, haddaad doonto faruuryaha ka gubo, ama haku dillaacaan, ama haku guduutaan. koowaad. Galabnimadii ayaa markii dadku naf gaarey, qaarna daatay, ayaa intii oo kale loo miisay!

**ODAYGII YIMI:**

Subixii dambe ayaa ninkii Soomaaliga ahaa ee Khartuum naga soo tahriibiyey, welina isagu masuul naga ah ilaa aan kuwa Liibiya ku wareegno, meeshii yimi, biyana ma keenin,laakiin gaarigii ayaa birihiisa lasoo samaynayaa ayaa la yiri, halkiina jooga! Ilaa saddex maalin ayey qaadaneysaa, in Khartuum la geeyo lasoo sameeyo, gaariga hoostiisa hala seexdo, ninkii meelahaas duurka ah aadaya waa isaga. Laakiin haddaad socotaba xageed aadeysaa. Waxaa bilawday Su'aal: war ma sidan ayaa lagu jirayaa ilaa xuduuda liibiya? Sow lama oran dhulkaba

waxaa lagaga gudbayaa 5 ama 7 cisho, haddana waxaan ku jirnaa 13 maalmood oo maalmaha u dambeeyey aan waxba dhuunta la marin. Alla nimanka tahriibka sameeyaa been badanaa oo arxan daranaa!

Halkii ayaa dadkii ku daatay, nafina waa haysaa, mar ayey yiraahdeen nimanka suudaantaa ee gawaarida wadaa: qorya soo gurta aan shah idiin karinee! Laakiin yaaba socon kara! Hadduu socdana yaaba qorya meesha ka helaaya. Inta aanu cabbaar soconey ayaanu qori qallalan oo shah lagu karsado weyney.

**Isha durdurkaa iyo Askartii Suudaan!**

Subixii afraad ayaa anagoo nafa meeshii nala kasoo dhaqaajiyey, waxaan soconey 24 saac oo xiriira, laakiin qardajeexa, oo baabuurku marna ciid gelayo, marna fariisanayo, oo kolba meel saacad iyo ka badan la fadhinayo. Subixii ku xigay ayaanu nimi meel dur dura oo il biya ahi ka socoto. Ilaahay baa mahad leh, waxba yaan la cunin haddii biya la helayo ayaanu is niri. Biyihii ayaa nala ku sii daayey, sida xoola xerada laga soo daayey ayaanu ugu qamaamney wixii socon karey. Biyihii ayaa si fiican loo cabbey.

Kadibna waxaa nala ku guray hal gaari oo weyn 76 qof. Markii aanu saa u dhaqaaqnay mise waa gaadhi cabdi bile ah (Toyota Landcruiser) nooca askartu qaadato ee dhabarka qaawan, ayaa halkaan mudh kasoo yidhi, waxaana dushiisa saran unug askartii Suudaanta ah, ee xuduudaha iyo duurka ilaalineysey. War Illey tanina waa inoo laabnayd, anagii naxdin ayaanu is eegnay, qof walba waxaa u sawirantay in dhaqsi lagu celinayo khartuum, xabsiyadii suudaantana lasoo booqanayo.

**Ka data!**

Gaarigii ayaa la joojiyey askartii ayaa isku kaaya hareeraysay, waxaana nala amray inaan gaariga kasoo daadanno. Meel halkaana ayaa nala tubay. Aniga ayaa laygu yiri soo bax si aan u turjubaano. La hadal adaa afkooda yaqaane! Mexey naga rabaan? Askartii wax badanba masii suginey wexey yiraahdeen: qof walba waxaanu ka rabnaa 100$ haddii kale waa idin xir xireynaa, khartuumna dib ayaan idiinku celineynaa, haddii kale na af garta! Talaa nagu caddaatay dadka qaarkood lacagba ma haystaan. Maxaan yeelnaa?

***

Waxaan soo gaarney anagoo banaanka nala tubay oo askartii suudaanta meesha nagu qabatay. Anigaa la ii yeeray oo layiri ka tarjum. Dadku waa 76 qof oo Soomaaliya oo hal gaari lagu guray. Askartii ayaan waxaan ku iri: Nimanyohow anaga Soomaali masaakiina oo tahriibeysa, oo adduunkaa Ilaahay calaf ka doon ah ayaanu nahay, dhib idiin ma wadno, waxna ma haysanno. Askarta ninkii u madaxda ahaa: Waan ognahay inaad tahriib tihiin, dhibna idin lama rabo, laakiin qofkiiba $100 ha bixiyo waa idin sii deyneynaa, haddii kale, dib ayaanu Khartuum idiinku celineynaa. Waxaan ku iri: Ikhwaanii dadku muddo ayey hadda safar kusoo jireen, duurka rafanayeen, sahaydiina waa ka dhamaatay, waxba haystaan waa dad masaakiin ah. Wuxuu yiri:

Idinkey idiin taallaa.. Qofkiiba $100 ha bixiyo, dumarka ayaanu idiin dhaafeynaa. Sidaan nimankii u gor gortameyney, waxaan isla gaarney, $20 qofkii iney ka qaataan, dumarkana iska dhaafaan. Lacagtii ayaan u ururinay, markaas ayey yiraahdeen: Fuula gaariga.

**ALLAHAYOW MAXAA NOO QORAN!**

Qofna waxa looxa loogu qoray ma oga. Markaanu is niraahno dhibkii wuu dhamaaday oo waa la soconayaaba waxaa noo bilawday bog cusub oo kii hore ka daran. Dad badan oo tahriibka soo marayaa ma oga waxa la marayo si maalin maalin ah, waxaa looga dulmaraa uun dhib ayaa jira. Sidan xitaa annagu marna uma suuraysan, laakiin maalinba maalinta ka dambaysa wey kasii adagtahay.

**80 KM maalintii oo dhan!**

Maalintii oo dhan waxaan soconey wax aan ka badnayn 80 km. Ka dibna gabbalku markuu noo dumey ayaa la yiri halkan ayaa la baryayaa, caawa, oo baabuurtii Liibyaanka ayaa halkan innoogu imaaneysa. 3 Gaari ayaa la keenayaaoo laydinku kala qaybinayaa. Laakiin subixii waxaa la helay hal gaari oo Landcruiserka (Cabdi Bile) Soomaalidu u taqaan, Annaguna waxaanu nahay 76 qof. Waxaa la yiri, labadii gaari oo kale goor dhow ayey imaanayaan ilaa galabta, gaarigan haddana qaybi hasii raacdo. Koox 27 qof ah oo wada socotey oo isku jicsin ahayd ayaa gaarigaas raacday. Mar dambe ayaan ogaaneynaa iney naga nasiib wanaagsanaayeen. Qofna waxa u qoran ma dhaafi karo.

**16 MAALIN IYO GAARIGA HOOSTIISA!**

Gawaaridii kale galabta ama berri ayey imaaneysaa wexey noqotay 16 maalmood inaanu meeshaas fadhino! Maalinba maalin nalooku dhiibo. Meesha aanu joogno, geed kuma yaal. Waa saxaara cidla ah dhul kaa dheer cir kaa dheer! Haddaad dhinac kasta u socoto, qoray qalalan inaad hesho lagama yaabo. Maalin walba qofka waxaa la siiyaa: 4 xabo oo balaxa (timir busura)iyo hal kabbasho oo biya ah, 24 saac qof walbaa intaas ayuu leeyahay. Maalinta oo dhanna wax kale indha saari mayo. Dadku maalma ka dib tabar darro iyo xanuun ayey la daateen. Qaar ayaa suuxsan, qaar ayaa taahaya, qaar ayaa xanuunsan, gaar ahaan dadkii sigaarka cabbi jirey oo dhibaata weyni qabsatay. 16ka maalmood, hal habeen ayey bariis qalalan dadka u kariyeen, hal maalinna qorya raadsada ayey dheheen shaah aan idiin karinee? Saxaaraha ayaa intayadii socon kartey ku yaacday, hal qorina waa lasoo waayey dab lagu shito.

**BANI AADAM BAHAL ISU BEDELEY!**

Waxaa la yaab leh, Bani aadamku marka diinta iyo dareenku ka dhamaado inuu isu bedelayo bahal aan haba yaraatee wax naxdina iyo naxariisa midna lahayn.

Nimanka dareewalada iyo shaqaalohooda iyo ninka safarta tahriibka hoggaaminaya ee Suudaantaa wexey wataan (neef weyn oo lo’a hilibkiis) oo la qallajiyey, oo baabuurka korkiisa u suran. Hadba xoogaa ayey goostaan oo karsadaan, maraqiisana cabbaan, hilibkiisana cunaan.

Hal Kabbasho qofna uma taagaan. Dadkii oo meesha daadsan oo indhaha kusoo eegaya oo dhimanaya ayey halkaas kore dabkooda ku shidanayaan, waxna ku karsanayaan. Meel aad u cararto ma taqaan, gabdhihii ayaa yiri waan soconeynaa, markey cabbaar socdeen oo haddeey 100 km socdaan aaney geedna arkayn ayey soo noqdeen! Habeenkii dadka intiisa badan gaariga hoostiisa ayey jiiftaan, maalintiina meesha ayaa lawada harsadaa. Dadka intiisa badan maba dhaqaaqi karaan oo naftii ayaaba kalxamaha u taagan. Qof qof ayaa weli dhaq dhaqaaq ku sii yar yahay.

**Maalintii 17aad**

Subixii 17aad ee aanu goobtaas fadhiney ayaa la yiri, baabuurtii Liibiya ka imaaneysey waa diyaar, soo fuula meel dhow ayeynu ugu tegeynaa. Waa soo luudnay, gawaarida dadka qaar maba fuuli karaan, waa in la qaado, qaarna naf weyn maba hayaan. Waxaanu nimi 2 buurood oo yar yar dhexdood, halkaas oo aanu ugu nimi 2 gaari oo kuwa soomaalidu u taqaan (cabdi bile) ah. Waa nimankii Liibiyiinta ahaa ee nagala wareegi lahaa Suudaanta.

**Wajiya Cabsi leh!Gadasha cusub!**

Nimanka Liibiyiinta ee 2da gaari wadaa waa 5 nin. Waa niman dalka Chad iyo Liibiya u dhexeeya, oo mad madow. Waa niman wajigooda laga boqo oo naxariisi aaney ka muuqan. Guul guulka iyo canaanta iyo hadalka ayaad durba ka garaneysaa waxa ka dambeeya. 2da gaari ee cabdi bile, xagga liibiya ayey u jeedaan. Gaarigii looriga ahaa ee Suudaantu wadateyna wuxuu u jeedaa xagga Suudaan. Waxaa u dhexeysa masaafo aan ku qaddari karno 25 ilaa 30 mitir. Gaarigii Suudaanta haddii aan kasoo deganney ee dhulka nala tubay, waxaa nala hadlay ninkii Suudaanta u weynaa, wuxuu yiri: Nimanka Liibiyaanka Lacag cusub ayey rabaan! Waayo kharash cusub ayaa lasoo galay. Waana arrin ay isla ogyihiin kooxahaan wax tahriibiya, mid kastaa markuu kan kale gacanta kuu gelinayo ayuu kaa iibsanayaa!! Maxaa yeelay wax damaana ah ma jiraan, wax lagaaga baqayana ma leh. Haddaad meesha ku dhimato, iyo haddii lagugu hilmaamo, cid iskaa weydiineysa malaha. Xagga ehelkaagi iyo Soomaalidana waxaad tahay nin tahriibka ku dhintay, haddiiba lagu ogaado oo lagu soo sheego. Cid aad u qorantahay, cid la xisaabtameysa nimankaan, cid ka dambaysa oo ay ka baqayaan, midna ma jiro. Waxaa la yiri, 2 kooxood ayaa laydiin qaybinayaa, qayb kastaa gaari ayey fuuleysaa. Qola kastaa $1000 ayey bixineysaa.

**Ka jab:**

Anagii ayaa is qabanay. Qolo wexey tiri, lacagtii weynu soo bixinay ilaa liibiya, mexey tahay lacagta cusub ee aan bixineynaa. Qolona wexey tiri, war meeshaan waa saxaara cidla ah, wax aynu qaban karnaana ma jiraan, aan lacagta iska bixino. Qoladaasu maba daahin, koox wada socota ooh al qoys u badan ayey ahaayeen, lacagtiina kaash ayey u bixiyeen. Annaga kooxdayada qaarkood lacagba ma haystaan. Anaaba ka mid ahaa oo 20 doolar ayaaba aan lacag markaa ka haystaa.

**SURWAALKA LAABKIISA HOOSE:**

Lacagaha meela adag oo hoose oo doqon ma garata ah ayaa la gashadaa. Sidaa surweelka laabkiisa hoose oo lagu tolo, iwm. Ninkii Suudaanta Watey ee (Sammaani) ayaan la gor gortamay, waxaanu is jiid jiidnaba waxaan la gaarey kooxdayada inuu ka qaado $400. Ka dibna markaan u dhiibey wuxuu iisoo celiyey $50 maadaama aan turjumaan u ahaa, oo igu yiri, adigu jidka ku mar.

**Gaarigii Eritreanka:**

Xaaladdu markey halkaa mareyso nimankiina aanu kala baxnay qoladii Suudaantu ay kuwii kale nagu wareejiyeen, laakiin aan weli gawaarida la fuulin, Suudaantiina ay weli taagantahay, waxaa qolada Liibiyaanka u yimi gaari kale oo cabdi bile ah, oo dad Eritrea ah wadey oo meel dhow intuu kusoo daadiyey, kuwan u yimi si ay isula jaan helaan. Dhinacooda ayuu gaarigii soo istaajiyey xagga Liibiya isagoo u jeeda, oo matoorku u shidan yahay ayuu kasoo degey, albaabkuna waa u furnaa. Kuwa annaga na qaadi lahaana wexey ku fooroорeen shag baabuurta mid ka mida ka halaysan oo ay hagaajinayeen. Wuu soo dul istaagey, isagoo leh miyeydaan dhaqsanayn? Suudaantiina xaggaas meel ah ayey weli taagan yihiin, oo iney dhaqaaqaan ayey isu diyaarinayaan, annaguna dhexda ayaan tubannahay.

**JABHADDA CADLI WAl MUSAAWAAT WAATAN MUDH SOO TIRI!**

Iyadoo sidaa loo yaallo, waqtiguna galab yahay, casarkii galay, ayaa halkaa waxaa kasoo mudh yidhi gaari cabdi bile ah, oo ay saarantahay koox askar ah oo tobaneeya ah, oo hubaysan, oo Jabhadda Cadli Wal Musaawaat ee Suudaanta Mucaaradka ku ah. Daqiiqado yar kadib wexey kasoo daateen gaarigii iyagoo meesha isku hareereeyey. Qaar wexey markiiba qabteen Gaarigii Suudaanta gacanta ayeyna ku dhigeen. Kuwa kalena dhinaca kuwii liibiyaanka ayey soo aadeen. Ninkii watey gaariga Eritreanka ah, gaarigiisu wuu shidnaaye, markiiba shirka ayuu ku boodey, marshuuna geliyey oo luguhuu wax ka deyey! Waxaa ka daba boodey oo gaariga dushiisa haleelay laba nin oo kale oo kuwii na wadi lahaa ah. Gaari xoogaa cusaybana wuu ahaaye, caguhuu wax ka deyey. Gaarigii Jabhadda oo dhawr nin saarantahay ayaa ka daba tegey xabadana ku ridey. Gaariga Jabhadda Qori weyn ayaa saaran, sida kuwa Soomaalidu ku dagaalantu oo teknikada loo yaqaan.

Wax yar ka dib, qadar 20 daqiiqadood ah, ayaa Gaarigii Jabhadda oo Gaarigii cararay soo qabtay soo noqday . Durawalkii Eritreanta wadey furihii gaariga ayaa laga qaaday, nin Jabhadda ka mid ah ayaa loo dhiibey oo lagu yiri: Gaarigan kexee oo saldhigii geey..Sidaas ayaa Gaarigii cararka damcay lagu qaniimaystey.

**Suudaantii Maxaa ku dhacay?**

Jabhadduu wexey markiiba hawsha waraysiga ka bilaabeen kooxdii Suudaanta ahayd, Waxaa lagu yiri: yaa madax ka ah kooxdaan? Ninkii (Sammaani) ahaa ayaa yiri: Waa aniga. Ninkii Jabhadda watey ayaa ku yidhi: Waan ognahay inaad dadkaan masaakiinta ah 16 cisho aad

meeshan dhow ku haysey, oo ku rafaadisay. Mid mid ayey u waraysteen, magacyadooda, qabiilooyinkooda, waxaa soo baxay nin ay caddaatay inuu reerka Madaxweynaha Cumar Al Bashiir yahay, kaas dhinac ayaa loola baxay, markiina garaac ayaa lagu bilaabay, waxaa lagu yiri: adigu marti qaad gaara ayaad leedahay! Waxaanu u qaadanay ineyba dhici karto iney ama dilaan ama xirtaan! Kuwii kalena meel ayaa lagu ururshey. Annagu meesha ayaanu tubanahay cidi wax nama yeelin. Maxaa tihiin? Anigaa la hadlay: Soomaali tahriibeysa oo masaakiina ayaanu nahay. Kooxdii Eritreanta ahayd ee meesha uu ku daadshey gaariguna waa la soo qaaday oo dhinacayaga ayaa lasoo tubay.

**Gawaarida ku fasaxa:**

Waa taan idiin sheegay inaanu 16 cisho waxba naga deign aan ka ahayn 4 xabo oo busura iyo kabbasha biyaa maalinka oo dhan. Jabhaddii wexey na yiraahdeen: Gawaarida fuula dadyohow oo wax walba oo aad ka cuni kartaan ama ka cabbi kartaan xor ayaad u tihiin ee cuna. Iyaga laftoodu wexey wateen buskud ay xoogaa noo daadiyeen.

**Nimankii Muharibiinta ee Cadawga ahaa Ilaah waa nooga aaray:**

Gacan ka xoog badan ayaa heshay. Baabuurtii ayaa lagu yaacay, nin biya hela nin, cunta hela, nin gasacad garaacda, nin xabbad kibisa oo qalalan meel ka hela, rag iyo dumar qof walbaa wixii kusoo hagaaga ayuu cunay! Kuwiina iyagoo dullaysan ayey na daawanayaan annagoo baabuurtii faganeyna. Kuwa soodaantaa, 16kii maalmood raashinkii ay iyaga keligood cunayeen ayaanu hadda hortooda, Ilaahay amarkiis, ku cuneynaa. Ilaahow adigaa qaadira!Waxaanse la yaabay dadka Soomaaliyeed qaar ayaa ka dhawrsaday nimanka xoogga lagu haysto woxooda iney boobaan, sidaa darteed dadkii ku yaacay kama ay qayb gelin!

Xoogaa biya ah oo Jabhaddu wadatey ayey na siiyeen, oo markii u horrayseyba dadka naftii ayaa kusoo noqotay. Kooxdan Jabhaddaa waxaa hoggaaminaya nin da'diisa aan is idhi waa dhawr iyo sodon jir. Aadna uma dheera mana gaabna. Waa nin dhuuban, cimaamad shaal yar ah ayaa duub ahaan ugu xiran, gar yar oo dhuuban ayuu leeyahay, surweel dheer iyo shaati aad moodu kuwa paakistaanta oo kale oo sii deysan ayuu gashan yahay. Buug iyo qalin ayuu gacanta ku sitaa. Ragga la socdaa isku wada lebbis maaha. Qaar ayaa dharka askarta lebbisan. Qaarna cimaamad weyn oo cad oo tan suudaanta ayey xidhanyihiin. Qaarna marada sariirta la goglo ayey hoos gunti u xidhan yihiin. Midba wuxuu arkay ayuu sitaa.

Wuxuu amray gaari iyo 2 askari iyo 2 Soomaali ah iney baxaan iyo biya soo dhaamiyaan. Intayadii kalena anagoo baabuurtii faganay oo buskud iyo cuntaba wax dhadhminay ayaa meeshayadii nala tubay. Dhinac waa Soomaalidii. Dhinac kale oo nagu dhowna waa Eritreantii 27 qof oo caruur iyo dumar u badan, sidaa waxaanu klu noqonay mar kale 76. Annaga awal waxaa naga tegey 27 qof. Haddana 27 Eritrean ah ayaa nagu soo biiray marka 49 Soomaali ah iyo 27 Eritrean ah ayaanu nahay.

**Askartii Jabhadda oo Gabdhihii Damac ka galay!!**

Waa markii noogu darrayd intaanu soo soconey. Gaajo aragnay, harraad aragnay, askar iyo xabsi ku sigannay. Hadba baad nala ka qaad. :Laakiin caawa waa imtixaankii ugu horreeyey uguna dhib badnaa oo ah nimankii Jabhadda qaar ka mida oo gabdhahayagii Soomaaliyeed hunguriyaynaya!

Waqtigu waa fiid..Nimankii biyaha doonay oo ninkii madaxda ahaa ku jiro wey maqanyihiin. Nimankii Tahriibka dhammaantood waxaa lagu kuusay hal meel. Jabhaddii wexey baarteen marka hore qolada Eritreanka ahaa, rag yar ilaa 8 ayaa ku jirey oo gaala u badan. Ka dibna anaga ayey noo yimaadeen. Qof walba xabbad sigaara ayey u taageen, xitaa dumarka. Kuwii cabbi jirey ayaa ka qaatay, intayadii kalena waa diidney. Ka dibna wey na baarteen, waxba noogama tegin wixii ay heli kareen, oo meelaha hoose aan lagu qarin.

***

Waxaan soo gaadhnay markey Jabhaddii (Al Cadl Wal Musaawaat) Saxaaraha nagu qabsadeen, Sidaan sheegnay Nimankii Suudaanta ahaa ee na wadey ayey garaaceen, gaar ahaan ninkii Tahriibka Hoggaaminayey ee (Sammaani) iyo Mid (Jucali) ah Qabiilka Madaxweyne Bashiir, Xitaa Cimaamadihii Suudaantu duubnayd intey ka diireen ayey dadkayagii u soo tureen iyagoo leh: Qorraxda ka harsada! Kadibna ninkii Jabhadda Watey iyo Askar uu kaxaystey iyo 2 Soomaali ah wuxuu doonay biyo, askartii kalana meeshuu uga tegey, gabalkiina waa dhacay.

Annaga iyo qoladii Eritreanka ayaa is ag naal. Waraysigii ay nala yeesheen: waxaanu ku niri annagu dad soomaali ah oo qaxootiya oo masaakiina oo tahriibaya ayaanu nahay, sidaa darteed waxba nameey yeelin, balse biyihii iyo cuntadii ayeyba nagu caawiyeen anagoo 20 cisho ku dhowaad qatanayn, dadkuna aad isaga baa ba’sanyahay.

ASKARTII JABHADDA OO GABDHAHAYAGII DAMAC KA GALAY!

Waa taan idiin soo sheegay iney ahayd markii noogu dhib badnayd. Fiidkii markii la gaarey ninkii Jabhadda u madax ahaa iyo colkuu kaxaystana ay weli dhaankii ku maqan yihiin, 2da reer ee Soomaalida iyo Eritreankuna is ag yaalaan, anigu waqtigaas intaan maqrib iyo cishe tukadey ayaan xoogaa seexday. Wax yar ka dib waa laysoo kiciyey inaan la hadlo nin noo yimi. Mise waaba askari ka mida jabhaddii na haysatey. Madaxa iyo afkuba waa u duuban yahay, qorina wuu wataa garabka u suran oo xagga dhulka afkiisu u jeedo. Annagu waa urursanahay, dumarkuna dhinac ragguna dhinac. Gabdhaha sidaan sheegay waa 8 mid keliya ayaa ninkeedii la socdaa inta kale keligood ayey tahriibayaan! Habla dhalin yar ayeyna u badan yihiin waxaan hal qof ka ahayn.

Ninkii jabhadka ahaa markaan la hadlay wuxuu yidhi:

waxaan rabnaa dumarka inaan waraysi ka qaadno, mid mid!!

**Waxaan ku idhi**: Dumarka keligood side u waraysaneysaa? Miyuu arrinkaasu idiin bannaanyahay?

**Wuxuu yidhi**: Amarku waa sidaas.

**Waxaan ku idhi**: Qof walba iyadoo maxramkeedu la socdo halkaan hortayada ah waxaad rabtaan ku weydiiya. Isla mar ahaantaas waxaan – afsoomaali – ku dhex geliyey, anigoo dadka la hadlaya: nimankan dumarka ayaa damac ka galay xaaladduna waa khatar, gabar walba qof ayeynu dheheynaa waa ninkeedi, rag iyo dumar sidaa hala ogaado, gabar walbaana nin agtiisa ha fariisato, mataabaneyso, laakiin agtiisa uun ha fariisato, sidaas ayaa uga dhib yar in ninkaanu jiito!

Dabadeedna waxaan idhi anigoo carabi iyo soomaali is dhex gelinaya, si jilid iyo dhaq dhaqaaq yari la socdo oo aanu askarigu igu dareemi Karin:

Heblaayo: intaan gabdhaha xagooda eegay: زوجك ج نب أج ـلـ سي ninkaaga agtiisa tag, Hebel: خذ زوج تك xaaskaaga agtaada fadhiisi, ninkii askariga ahaana waxaan ku leeyahay, anoo marna xaggiisa eegaya, marna xagga dadka: eeg haweeney kasta ninkeedi waa kan. Waxaan filayaa iney ahayd fikrad Ilaahay I waafajiyey, si fiicanna aan u jilay, Ilaahayna nagu guuleeyey.

Waxaa xoogaa hakatay gabar gabdhaha ka mida oo tidhi: sideen u dhinac fadhiistaa nin aan maxram ii ahayn!!! Saxaaraha Liibiya ayeyna jeexeysaa maxram la’aan, yurubna wey u jeeddaa!! Waxaan ku idhi: haddaadan sidaa yeelin waxaad khatar ugu jirtaa ninkaan inaanu kaa celin kari weynu, dhaqsi u istaag, dadkiina waa ku qayliyeen, markaas ayey yeeshay. Gabadhaas maalma ka dib saxaaraha ayaanu ku aasi doonaa (Allaha u naariistee) gaajo iyo harraad markii loo le’day!!oo 12 qof naga dhinteen saxaaraha dhexdeeda. Gabadhii ninkeedu dhaanka ku maqnaana sidii ayaan ugu sheegay si hadalku dhab u noqdo: waxaanan iri gabadhaa soo hartay waa midda ninkeedu dhaanka ku maqanyahay!! Iyadana gabdhaha kale ag fariiso ayaan niri.

**Wuxuu yidhi isagoo qoriga xagayga u soo jeediyey**: Riwaayad ayaad dhigeysaa, haddaadan ka leexan xabbad ayaan kugu dhufanayaa.

**Waxaan ku idhi**: Anigu sidii wax u jireen ayaan kuu sheegay, haweenkaan waa dumar la qabo, mid walbana ninkeeda ayaa la socda (dadkana faraha tag taaga) ayaan ku idhi.

Xoogaa hadduu handadaad iyo caga juglayn igu sameeyey, qorigana xabadka iga saaray, dadkuna I dhiirri gelinayaan oo leeyihiin: ha biqin, haka cabsan, kulligeen waa ku wada dhimaneynaa. Dumarkuna oohin iyo wel wel isku darayaan, ayaa ilaahay naga kaxeeyey, oo uu dib u gurtay.

Alxamdulilaah, neef weyn ayaa naga soo baxday, Ilaahayna waan ugu mahadinay bahalka naga kaxeeyey. Laakiin nasiib darro, wax yar ka dib, waxaan maqleynaa dumarkii Eritreanka ahaa oo bahalkii jiitey qayladoodii oo bexeysa iyagoo la fara xumaynayo!



## DHAANKII WAA YIMI

Saq dhexi ayaa ninkii jabhadda watey iyo dhaankii soo noqdeen, biya fiicanna wey keeneen, ilaa 2 jirigaan oo waaweyn, biyahana meel ilaa 80 km jirta ayey ka dooneen. Dadku biyihii ayey cabbeen, si fiican uga noolaadeen, inkastoo qofku maadaama uu muddo cunta la'aan, iyo biya la'aan ahaa, oo aad u liitaan, taasoo keeneysa inaan biyaha xitaa lagu wada fasixi Karin. Habeenkii sidaas ayaa lagu baryey.

## SUBIXII DAMBE

Ninkii Jabhadda watey ayaa noo yeeray, wuxuu yiri: Soomaalidiina 3000$ (saddex kun oo doolar) ayaad bixineysaan haddaad rabtaan in laydin sii daayo, haddii kale, saxaarahaan ayaad gaaja ugu dhimaneysaan, waayo baabuurtu annagey qaniima noo tahay oo qaadaneyna.

Waxaan ku iri: ninyohow 16 cisho ayaanu waadi "malak" fadhiney sidaad ogtahay, kahorna 20 cisho ayaanu safar Suudaan dhexdeeda kusoo jirney, Askartii Suudaanta ayaa lacag naga qaadatay, oo kuwan tahriibka ayaa naga qaatay, oo kuwii hore ee khartuum ayaa naga qaatay, oo xalay askartaada ayaa na baaratay oo wixii ugu dambeeyey naga furtay, dadkaanu waa rafaadsanyihiin, waana dhibaataysan yihiin, inaad iska kaaya deysaan ayaanu codsaneynaa. Haddeydaan na deyn karinna bal xitaa noo dhoweeya meel magaalo iyo degaan bani aadam ka dhow yahay. Xitaa Daarfuur na geeya haddaad dooneysaan.

**Wuxuu yidhi:** Xukuumadda Suudaan side u aragtaan?

Waan ognahay iney mucaarad keedi yihiin, haddaan amaanana nalaba dili karo waxaan iri: Waa xukuumad daalima oo gardaran oo tacadi badan dadkeeda ku samaysa.

Wuxuu yidhi: Waayahay waan idin sii deyneynaa, laakiin dadkan reer Eritereeya ayaad qaadeysaan, waayo baabuurkoodi waanu qaadannay. Labadiina baabuur ayaa Soomaali iyo eritereya wada raaceysaan. Ma diidi Karin xaaladdaas, wallow 80 qof sida 2 gaari oo cabdi bili ah loo saarayo aanan garanayn. Waxaanu niri: Samcan wadaaca.

## FUULA BAABUURTA

Baabuurkii koowaad ayaa la yiri Soomaalidu ha fuusho ilaa 40 qof, inta Soomaalida kasoo hartaana gaariga kale ha fuulaan, kadibna kaas labaad Eritereanku ha dhamaystiraan. Sidii ayaa la yeelay gaarina waxaa fuulay 39 Soomaali ah, 10kii kale ee Soomaalida ahaa iyo 27 Eritreanka ahaana gaarigii kale ayey fuuleen, intaa waxaa dheer nimankii tahriibka iyo dureewaladii.

Ninkii Jabhadda watey wuxuu dareewalka u qoray warqad ku socota ciidamada jabhadda ee naga horreeya wuxuuna u tilmaamay jidka uu marayo ee ugu dhow xuduudda Liibiya, wuxuuna yiri: Ciddii aad aragto ee ciidankayaga ah warqaddaa tusi waa lagu sii deynayaa, berritana barqadii waxaad gaari doontaa (kafra) oo xadka liibiya ah.

Waxaanu kasoo dhaqaaqnay ku dhowaadka 11 subaxnimo, labadii gaari oo ciir ciiraya, sida koronkorada oo kale loo saaranyahay dadkuna is dul saaranyihiin, 39 qof gaariga korkiisa saaran rag iyo dumar waad garan kartaa hadii qof ama labo kugu fariistaan ayaad nasiib badantahay oo aan intaa ka badani ku buuran:

**Xagee loo socdaa?**

Dareewalkii na wadey wuxuu ka baqay warqadda loo qoray iney shirqool tahay oo qolada kale ee jabhaddaa markuu gaaro ay gaariga ka qaataan, sida gaarigii hore ee Eritreanka loo dhacay, sidaa darteed wuxuu qaaday wadda kale oo fog, wuxuuna u jihaystay xagga xuduuda Masar, taasoo wareeg dheer noqoneysa. Taleefankii thurayada ahaa ee ragga tahriibkana waxaa qaadatay Jabhadda inkastoo ay markii dambe naga daba keeneen oo soo cesheen.

**Gaarigii oo Jabay.. iyo Dagaal kharaar oo huray!**

Abbaaraha duhurkii markey ahayd ayaa gaarigii aan saarnayn biri ka jabtay, ciidana afkuu la galay. Wuxuu dareewalkii tahriibka (waa liibimadow oo jaadi ah, naxariisina agtiisa aaney soo marin) wuxuu yiri: gaariga hoos ka mara oo ciida ka qaada. Gaarigii ayaan kasoo deganey intayadii wax qaban kartey, gaarigii ayaan hoosta ka galnay annagoo isku deyeyna inaan ciidda ka bixino, gaarigii kale oo 10 soomaalidaa iyo Eritereanka wadeyna wuu na ag taagan yahay wuxuu noo jiraa ilaa 200 tallaabo, iyadoo halkaa la joogo, waqtiguna kululyahay, saxaara cidlaana la joogo, ayaa Soomaalidii gaariga kale saarnayd iyo Eritreankii la socdey dagaal ka dhex dillaacay, hal mar ayaanu waxaan ku war hellay gaarigii kale oo dagaal ka huray, gacan iyo addinna laysku garaacayo. War ma dadkii maatada ahaa ayaa diriraya? Waa haahey.. Soomaalidii halkan ciidda faraha kula jirtey hal mar ayey dhanka kale u yaaceen, si ay dagaalka uga qayb galaan. Markii raggii Soomaalida iyo Eriteriyaanka fooda is daray, ayaa labadii dumarna isku soo boodeen! mid timaha la jiido, iyo mid qaniinya lagu dhego, iyo mid hoosta la marsado ayey noqotay.

Nimankii tahriibka wadey dagaalkii waa qaboojin kari waayeen. Dabadeed mid ka mida ayaa gaarigii mooteeyey, dadkiina is haystey ayuu ku keenay inuu dul marsiiyo, markaas ayey kala carareen, wuu ku cayrsadey, oo marba dhinac ugu qaaday, ilaa fiin firirtay la kala noqday, oo gabar yar oo baabuurka korkiisa saarnayd oo 12 jir meeleheeda ah gaarigii dushiisa kasoo duushay, oo dhinac iyo garab ka jabtay, kuwii dagaalamayey markuu kala cayrshey ayuu intayadii gaariga kale hoos joogtey ku keenay, malaha wuxuu ku tashaday inuu qaar badan saxaaraha ku aaso! Ilaahay ayaa naga sabata bixiyey, anigu waxaan dusha uga boodey dhagax weyn oo gaarigii soo mari waayey.

Markuu gaarigii joojiyey ayuu yiri: dhammaan wixii mindiya haysta halkaan hasoo dhigaan, qof mindi ama bir wax goysa wataa ma fuulayo gaariga. Qofkii juuq yidhaahda ama madaxa kor u qaada, wuxuu ku garaacaya tuubo dheer oo uu wato oo laba mitir ah. Hadduu hadalka sii badiyana gaariga ayuu ka tuurayaa. Waa dad aragoodu ku cabsi geliyo. Ninkii gaarigiisa Jabhaddu qaadatay oo nala socda ayaa ugu naxariis roonaa. Isaga keliya ayaa ka tukan jirey nimankaas. Soomaalida oo dhan waxaa markaa ka tukanayey aniga iyo wiil kale, mid saddexaadna mar mar ayuu nala tukan jirey. Sidaa darteed ayuu ninkan Suudaaniga ee tukadaa mar mar ii naxariisan jirey, maadaama aan wada tukano (magiciisa Aadam ayaa la dhihi jirey).

***

**Baabuurkii la xir xir!**

Waqti badan oo xarga lagu dhuu dhuujiyey ka dib, gaarigii waa dhaqaaqay, maalintii oo dhan ayaan soconey, habeenkii markuu dumey ayey meel joojiyeen, ilaa dayaxu soo boxo, waayo nalka iney shidaan ma rabaan baqdin darteed. Mar kasta waa in la sugaa dayaxa markaas ayaa la dhaqaajinayaa iyadoo lagu soconayo iftiinka dayaxa. Maalintaas oo dhan iyo habeen kaas waxba nagama degin cunto iyo biyo midna. Waxaa oon noogu dambaysey biyihii ay jabhaddu shalay na waraabisay. Saxaaradu waa dhinac walba cirkaa kusoo celinaya. Wax dhaq dhaqaaqa ama nolola haba yaraatee ma arkeysid. Nimankanu biyo iyo cuntaba wey wataan, laakiin kuma soo eegayaan. Waa 21 June, maalintii waa kulayl aad u daran habeenkii ayaa xoogaa neecaw, mar mar qabow soo dhacdaa. Awalna 17 cisho ayaanu xabad timira iyo kabasho biyaa kusoo joogney, dadka nololi kama muuqato, waa iska socdaan, qaarna waaba socod gabeen, waa in la saaro gaariga. Habeen badhkii ayey wexey yidhaahdeen: Qof kasta carrabka ayaa loo qooynayaa!! In kabbasho ka yar, cantuuga warkeeda daa, ayey noo qaybiyeen.

**22 June**

Markii dayaxu soo baxay ayaanu dhaqaaqnay, gaarigu xitaa markuu socdo waa luudayaa, culayska, gabowga, iyo duruufta wadada darteed. Waagu markuu dillaacay ayaa xoogaa la joojiyey. Afar qof ayaanu ku tukaney, dadkii sideetanka ahaa. Nimanka Eriteriyiinta badankoodu waa nasaaro, waxaan ka arkeyney saliibka iyo baryadiisa mar marka qaarkood. Kadibna waa la dhaqaajiyey. Qorraxdii ayaa soo kululaatay, dadkiina waa isdul saaranyahay.

**Suuxitaankii oo bilawday!!**

Dadka qaar ayaa bilaabay iney miyir beelaan. Qaar badanna maba is dhaqaajin karaan, hadalna waa gabeen, gaariga kamana degi karaan, mana fuuli karaan. Gaarigii ayaa intii qaylinkartey garaacday, waa qayliyeen. Abbaaraha 3 galabnimo ayuu joojiyey gaariga. Wixii dhaqaaqi karey ayuu yiri saf soo gala, xoogaa biyaa oo uu hayey ayuu banziin ku walaaqay, wuxuu yiri: Qof walba kabbasho ayaa la siinayaa. Dadka qaar wey diideen banziinka, anigaa ka mid ahaa. Dadna wey cabbeen, weyna ku dhibaatoodeen, wexey ku waasheen hunqaaco iyo miyir beel iyo xanuun.




Gabbalku markuu dhacay ayey meel istaageen dadkiina wey is daadiyeen wixii dhaqaaqi karey, 39 qof ayaa gaarigayaga saarnaa 17 keliya ayaa miyir qabey. 22 qof oo giddigood rag ahna waa xanuun iyo miyir beel. Qaarkood dadku wexey dhahayeen: war kanu waa dhintaye aan gaariga ka tuurno culayskiisa haynaga yaraadee!!Habeenkii meeshaas ayaa la degey, waxna dhuunta lama marin, biyo iyo cunno midna.

**Wax Bani aadam u eg, oo haddana aan ahayn!!**

Meesha dadka xaalkoodu sidaa yahay, kuwan muharibiinta ah ee liibiyaankaa waxbey karsanayaan, hilib iyo maraq, biyey cabbayaan, qofna soo eegi maayaan, qofkii dhinta meeshaas ayaa lagu tuurayaa.

**23 June & 24 June**

Labada maalinba sidii oo kale ayaa lagu socdey, waxna dadka dhuunta uma marin, heer dareewalada naftooda ay biyihii ka dhamaadeen, oo uu dadka tusay jerigaankii oo ebera, isagoo leh, wexeynu gaareynaa berri (kafra) xuduudka Liibiya, maaweeladaas oo kolba markey arkaan dadkii oo baa ba'san ay lasoo baxaan, weli dad ma dhiman laakiin dad badani waxba kuma noola.

**GALABTII 24 JUNE..GALAB NAXDIN BADAN!!**

Markey saacadu ahayd abbaaraha 5.30 galabnimo, inta aaney qorraxdu dhicin wax yar ka hor ayaa gaarigii markale jabay oo biri baf tiri.. Halkii ayuu yiri dareewalku kasoo dega, halkanaan cabbaar joogeynaa inta aan gaariga hagaajineyno caawaba (kafra) Liibiya ayaan geleynaa, meel kale lama seexanayo, waase hadal uu doonayo dadka inuu mooralka ugu dhiso oo aan waxba ka jirin.

Dadka qaar waa miyir beeleen..Qaarna waa soo jeedaan laakiin ma hadli karaan, qaarna hadal goos goos ah ayey ku dardaarmayaan.

Waqtigii maqribka ayaa soo galay.. xitaa ninkii xoogaada naxariistaa lahaa ee tukan jirey (Adam) markii xaalku xumaaday kabashadii biyaha oo uu mar mar isiin jirey waa go'day..ducfi aad u badan ayaan dareemayaa.. Maqribkii ayaan fadhi ku tukadey, waa markii u horreysey oo aan fadhi salaad faradh ah aan ku tukado..ma istaagi karo, mana socon karo, dareewalkii gaariga ayuu hoosta kaga jiraa, ninkii kalena hilib ayuu meel halkaas ah ku karinayaa.!! Waa Bani aadam aynaan ka sheekayn karin ineynu aragno mooyaane!! Xagoodii ayaan u gurguurtey, anigoo salka iyo gacmaha ku gur guuranaya. Ninkii xoogaada naxariistaa lahaa ayaan gaarey, dadka kale maba gurguuran karaan..

Ninkii (Adam) ahaa ayaan ku soo dhowaadey, anigoo ku eegaya indha meel fog kasoo jeeda..Mar mar ayey indhuhu afka hadalka uga dheereeyaan..Intuu ninkii kale ee saaxiibkiis ahaa oo gaariga ku hoos jira iska jalleecay, ayuu koomba yar wuxuu ii daray maraqii uu

karinayey! Waa koombada nuskeed.. Alxamdulilah..Waan cabbay, oo kulaylkeeda xitaa ma dareemin. Markaan koombadii fuuqsaday, ayaan xoogaa naf ahi iney igu soo noqotay dareemay..Balse xoog aan igu jirin ayaaba I galay..

**IFTIIN YAR OO MEEL FOG KA MUUQDA!**

Xaaladda aanu ku sugnayn markaas waa geeri..oo qofku aanu waxba arkayn, laakiin meeshuu Ilaahay wax ka wado waa wax kale.. meel fog ayaan waxaan ka arkay iftiin ka bilig leh, tabartayada marka la eego meel fog ayuu u muuqdey laakiin xaqiiqa ahaan kama fogayn 1 km. Anoo dadka ugu roon ayaaba sidaa u arka, dadka kale maba arki karaan, mana socon karaan. Waan is tiilay anoo isku deyaya inaan iftiinkaas naf ka dayo..ku dhowaad saacad ayaan daalaa dhacayey masaafadaas yar, wexey igala dheerayd 100 km..

Markaan soo gaadhay waxaan u imi 2 gaadi oo dad tahriiba wada oo meel isku dhow fadhiya. Sidey isku jicsinka u ahaayeenna koox koox u fadhiya, waxaan u gartay iney af ka mida kuwa itoobiya ku hadlayaan, waxaanse kula hadlay af ingiriisi, waxaanan u sheegay inaanu aad u dhibaataysanahay. Kooxdii koowaad ima soo dhowayn, kooxdii labaadna sidoo kale, kooxdii saddexaad ee gaarigii koowaad ayaa isoo dhoweysey, wey I fariisiyeen, dhala yar oo biyaa ayaa laysiiyey oo lagu qooshay buskut ama boorish, si aaney caloosha iigaga dhicin, waxaan ku iri dad ayaa meeshan ku dhammaanaya, haddad wax aan u geeyo I siin kartaan, waxaa lay siiyey gasac furuto ah oo aan nus ka cunay, dhala kale oo biya ah oo litar ahna waa lay siiyey, iyo gasac xiran oo furuto ah, dhaladii biyaha oo xirnayd iyo gasicii xirnaa iyo kii aan wax yar ka cunay ayaan lasoo orday, waxaan u imi dadkii oo dhulka wada yaalla oo geeri iyo halaag intooda badani ku sugantahay, biyihii ayaan kuwooda ugu daran afka uga shushubay midba wax yar, biyihii furutadana sidoo kale, wixii ku jireyna waan u jar jaray, sidaa ayaa qaarkood naftu ugu soo noqotay laakiin sakaraad weyn ayaa dadka ka muuqda. Laakiin Soomaalidii waan wada gaarsiiyey.

Waxaa igu soo dhacday fikrad ah maadaama aan xoogaa nashaada helay inaan gaarigii kale ku noqdo oo dadkii saarnaa iyagana wax soo weydiiyo, waan ku noqday intii hore in la eg ayaan kasoo helay, sidii oo kale ayaan dadkii ugu qaybshey, alxamdulilaah, dadkii xoogaa miyir ayaa ku soo noqday, aniguna si fiican ayaan u seexday.

Habeenku markuu kala badhmay oo dayuxu soo baxay ayaa nala toosiyey gawaaridhii ayaa dadkii la saaray, waana la dhaqaaqay sidii caadada ahayd inkastoo uu yahay dhaqaaq aan xoog badnayn.

**25 June Bilawgii Geerida!**

Maanta waa 25kii bisha waxaanu saxaaraha dhex meereynaa bil iyo 5 cisho, abaaraha markii ay ahayd 10 am ayaa gaarigii na wadey wuxuu galay buur ciid ah, si looga saarana la garanwaa. Dadka meesha saarani waa meyd aan waxba qaadi karin waxna riixi karin. Gaarigii ayaa laga degtey, qoraxdiina wey kululaatay, gaajadii iyo harraadkiina dadka meel kasta ayuu ka gaaray.

Gaariga matoorkii waa damey.. gaarigii kale oo eiteryaanka wadeyna agtayada ayuu soo istaagey. Dadkii wexey hoosta kaga aruureen baabuurtii iyagoo hadhkeeda naf ka deyaya.

**Xaalad aan la sawiri karin!**

Xaaladda dadku ku sugnaa meeshaas ma sifayn karo si kasta oo aan luqadda ugu xeel dheeraado. Dadka qaar wey taahayaan, qaar dardaaran daciifa ayey dardaarmayaan, qaar waa miyir daboolmeen, qaar mana hadli karaan mana dhaqaaqi karaan. Dareewaladu wexey belaabeen iney taleefanka thurayada kula xiriiraan baabuur kale…

***

**Dadkii oo kaadidii cabbaya!**

Weligay ma suuraysan in dadku ku qamaamayaan iney cabbaan kaadida ka timada iyaga ama qaarkooda kale, dadka qaar ayaa ku qooshanayey bur cad gaariga laga helay, dareewalkii (adam) ayaa dadka kaadida ka celinayey laakiin dheg looma jalaq siin, 4 qof keliya ayaa ilaahay nagaga bad baadshey inaanu cabno, dadka intoodii kale wey cabbeen.

**Biyihii Radeetarka (qaboojiyaha) gaariga yaa cabbey!**

Wiil Soomaaliya ayaa gaarigii Eriteriyaanka sidey hoosta ka galay,intii dadku ku sii jeedey riixidda gaariga ciidda galay,  wuxuu hoos ka furay furkii Radeetarka biyihii ku jirey matoorka ayuu fuuqsaday, kadibna hunqaaco ayuu ku waashay, dadkii kaadida cabbeyna xanuun ayaa siyaada u qabtay.

**Dhala biyaa oo joogta $ 800!**

Waxaan intii hore fadhiyey gaariga korkiisa anoo qoraxda iska xejinaya jirigaan faaruqa, laakiin markii qorraxdii kululaatey ayaa jirigaankii igu dhalaalay, waan fadhin kari waayey gaariga hoostiisa oo laga buuxo ayaan usoo degey, qaarkiisa dambe ayaan isku cariiriyey, harraadka dhuuntu waa qalashay, gaajadana warkeeda ha sheegin, dhawr maalmood waxba nagama degin aan ahayn xoogaadii furutada oo aan soo sheegay. Waxaa hortayda fadhiyey gaariga hoostiisa 2 eritrean ah oo xoogaa nafi ku dambayso oo sheekaysanaya. Ortooda ayaa waxaa u taal dhala yar oo biya ah oo hal litar ah. Wiil Soomaaliya ayaa u yimi oo ku yiri: Waxaan xoola haystaa  $800 iyo moobil, ee dhaladan biyaha mayga siineysaa. Waa markaan ogaadey qiimaha adduunyadu ku fadhido, nin xoolihiisii oo dhan siisanaya dhala yar oo biyaa. Hadduu ka badan haysan lahaana wuu ku gadan lahaa. Waxaan kaloo ku ogaadey nicmooyinka faraha badan oo aynu haysanno laakiin aan qiime weyn inala lahayn markaynu haysanno. Ninkii wuu diidey.

**Dhalada Qur'aan la saaray iyo Mucjiso!**

Cabbaar haddii aan ag jiifey nimanka eritreanka ah ee sheekaysanaya, dhaladuna hor taalo afkeeda ayaa igu soo jeeda, weyna jiiftaa. Waxaa nimanka noo dhexeeja in hal taako la eg.

Waxaa hunguri iga galay dhaladii biyaha ahayd, laakiin waan liitaa, nimankuna iga xoog badan oo waa I dili karaan haddaan taabto. Waxaan bilaabay inaan qur'aan akhriyo. Ilaahay fadligiis maadaama aan Qur'aanka xafidsanaa, waxaan bilaabay Suuratul Al Ancaam, waan wadey waan wadey, ilaa aan ka gaaro qisada Nebi Ibraahim Calayhi Salaam:

**(وإذ قال إبراهيم لأبيه آزر)** waxaan bilaabay hadana Suuratu Camma oo aan dhameeyey, kadibna waxaan gacanta ku haahaabtay dhaladii biyaha anoo nimankana iska eegaya, dhalada madexeeda ayaan qabtay, nimankii waa sheekaysanayaan, aniga ayeyna I eegayaan dhaladuna dhexdeena ayey taal, indhaha ayey igu hayaan, waxaan dhawrayaa goorma ayaa feerku kugu bilaaban doonaa, mise waxba juuq iima laha, dhaladii ayaan soo qaaday, mise waa ii jeedaan juuqna malaha, dhaladii ayaan furay, afkaan gashaday, waana fuuqsaday iyadoo dhan, waxaan is iri kolba waa lagu dilayaaye biyaha inta ugu badan cab, ama dhawr jeer qurquri, laakiin yaabku wuxuu ahaa inaan biyihii oo dhan cabbey nimankii oo I daawanaya, dabadeedna dhaladii ayaan meel fog ku tuuray, dhidid ayaa fayx iga soo yiri, waanan qaboobey, hurdaana I qabatay oo dug ayaan iri. Wax yar kadib ayey nimankii sidii wax hurda ka kacay biyihii iney maqan yihiin ku baraarugeen, mana shakin haba yaraatee ninkan hortiina fadhiya ayaa cabbey. Wexey u dhaqaaqeen bannaanka, wexey u tageen dareewalkii gaariga wexey dheheen waxaa nalaga cabbey biyihii, wuxuu ku yidhi: yaa idinka cabbey ii sheega anaa garaacaya? Wexey dheheen ma naqaan. Hawshaasuna halkaas ayey ku dhammaatay wexey ahayd biyo ilaahay iigu soo dhiibey nimankaas.

**Gaariga riixa!Biyaa imanayee!**

Ninkii Dareewalka ahaa ayaa dadka ku yidhi gaariga riixa aan ciida ka saarnee, biyihiina wey soo socdaan oo qolaan la hadlay, si uu u dhiirri geliyo, oo gaariga meesha looga saaro, waa laysugu tegey oo gaarigii meeshii waa laga saaray.

**NINKII U HORREEYEY OO NAGA DHINTAY!**

Abbaarihii 3dii galabnimo ayaa qofkii ugu horreeyey gaajo iyo harraad u dhintay. Wuxuu ahaa nin dhalinyara ah oo Burhaan la oran jirey oo reerka Abgaal u dhashay. Meel gaariga u dhow ayuu ciidda jiifey, kadibna naftii ayaa ka baxday. Ciida ayaanu meel u xaadhney oo ku ridney, halkii ayaana looga tegey. Wexey ahayd arrin naxdin badan qofkii oo aad u jeedo oo hortaada harraad ugu dhimanaya, iyo kuwa badan oo naftii kasii bixi rabto, waxna aadan u qaban karin, balse adigu aad taadii la liidato.

**Gaarigii kale oo dhaqaaqi waayey!**

Gaarigii halaysnaa haddaanu ciiddii ka saarnay midkii kale ayaa dhaqaaqi waayey waayo waatii aan soo sheegay biyihii radeetarka inuu wiil dhalinta ka mid ahi ka cabbey, kadibna dareewalku muharibiin kale ayuu la hadlay oo gabbal dhicii u keenay jirigaan biyaa. Biyihii ayuu nusna gaariga ku shubay, nuskii kalena dadka ayaa afka loogu qooyey. Kadibna waan dhaqaaqnay waxaana lagu dheelmaday meeshii ninku biyaha kasoo qaaday oo buuro yar yar agteed ahayd halkaasoo habeenkii lagu baryey, waxna lama cunin waxna lama cabbin.

**26 June 2 dhimasho oo kale!**

Sidii maalmihii hore oo kale ayaan loo socdey cuntana maleh, biyana maleh, abbaaraha 10kii subaxnimo ayaa waxaa dhintay gaajo iyo harraad 2 dhalinyaro Soomaaliya oo kale, maydkoodiina gaariguu noo saaranyahay, dadka qaar ayaa wexey leeyihiin war maydka naga tuura, qaarna wexey leeyihiin aan hayno ilaa aan meel tagno aan ku aasno..Waa dhalinyaro ku fekereysey yurub iney u tahriibto, nolol cusub iney gaarto, laakiin wexey ku naf bexeen gaajo iyo harraad saxaaraha liibiya iyo suudaan u dhexeeya. Dhalinyara badan ayaa wadada soo haysa mana oga dhibka aanu maanta mareyno. Feker weyn ayaa igu baahey, waxaan is weydiiyey haddaan ogaan lahaa intan oo rafaada oo dhimasha ah haddaan ka war hayn lahaa masoo mari lahaa? Jawaabtu waa maya.. waxaa kasii daran ayaamaha soo socda maxaa iigu dhex qarsoon? Malaga yaabaa dhibkan hadda jira kuwa kasii daran inaan la kulanno? Waaba loo joogaa, waxaana hubantiya weli in ayaamuhu rimman yihiin, wax badan oo yaab lehna kasoo bixi doonaan. Labada wiil oo dhintay mid ayaa u dhashay beesha gaal jecel, kan kale ma garanayo. Magacyadoodana ma aqaan.

Dadka kale waa sidoodi in badan ayaa miyir beel ah, inna waa wax suuxsan oo kale, in kale meydka waxba ma dhaamaan, tabar yaridu meel kasta ayey ka haleeshay, ayaamo ooni kama degin, biyana lama arag, qaar ayaa weli kaadida cabbaya, haddiiba kaadi ka timaado, iyada lafteeda ayaa layskuba dilayaa!!

**27 & 28 June**

Sidii maalmihii hore ayaa iyagana loo socdey, nimanka muharibiintaa wexey dadka ku maaweeliyaan waa dhownahay, galabta ayaan geleynaa xuduuda liibiya, biyahana waa gaareynaa.. Laakiin waa sheeka dhalanteeda oo aan waxba ka jirin, gaariguna xoogaa yar hadduu socdo waa jabayaa, ama ciid ayuu gelayaa, waayo waa gawaari duuga oo aan dayac tir fiican lahayn, dhulkuna waa saxaara aan wada fiican lahayn ee qardajeex ah. Waxaa suurta gashay inaan wiilashii meydka ahaa aasno.

**29 June**

Subaxnimadii ayaanu sidii caadada ahayd dhaqaaqnay, waxaanba is leeyahay todoba maalmood ayaa meela isku dhow oo boqol kiiloomitir aan ka badnayn lagu wareegaalaysanayaa. Xitaa nimanka tahriibka qaar ayaanba wadooyinka si fiican u aqoon. Maanta qaar reer eriteriya ah ayaa dhintay, tiradooda ma garanayo, gaariga kale ayey saarnaayeen. Labadii gaari kaan la soconey maahane kii kale, biyihii iyo shidaalkiiba waa ka dhamaadeen, bartiisa ayuu istaagey, eriteriyiin iyo qaar soomaaliya ayaa saaran. Gaarigii aan saarnayn ayaa horay u socday, ilaa galab nimadii wuxuu soo gaarey buur yar hoosteeda. Wuxuu yiri, gaarigu buurta kama bixi karo iyadoo dadku saaran yahay. Sidaa darteed waa in laga degaa oo dadku buurta lug kusoo fuulaan. Waa buur yar laakiin dadku dad nafi ku jirto oo xitaa socod awoodi kara maaha, waa dad maliila oo cisbitaallo iyo baxnaanin deg dega u baahan.

Laakiin meeshii hoose ayuu dadkii ku daadshey waxaa kaloo saaran 2 meyda oo intaan maanta soo soconey wadada ku dhintay. Gaariga dushiisa wuxuu ku reebay oo keliya 2dii meydka ahaa iyo haweeney nala socotey oo degi kari weydey. 37 qof ayaanu ahayn, waxaa buurta korkeeda gaarey oo qudha annagoo 7 ah, lix Soomaaliya iyo hal eriteriya.

Dadkii kaloo dhan qofba meeshii naftu la gaartey ayuu ku dhacay, qaar ayaa gurguuranayey, qaarna salka ayey ku socdeen, cid cid wax u qaban kartaa ma jirto qof walbow iyo naftaa. Waan maqleynaa taaha iyo cabaadka dadka qaar ka baxaya, laakiin anaga ayaaba silic buurta korkeeda ku gaadhney markii qorraxdu dhacday. Dureewalku wuxuu dhulka kasoo faagey jirigaan biya ku jiraan oo malaha uu meesha ku ogaa. Qof walba intayadii joogtey ayuu kabbasha biyaa siiyey, dhuunta ayuu u qooyey. Kadibna wuxuu yiri isagoo meel xoogaa fog farta ku fiiqaya, buurtaas ma u jeedaan, gadaasheeda weeye magaaladii (kafra) oo aynu u soconey, waa dhownahay, caawaba waa geleynaa, halkiina igu suga, dadkii maatada ahaa ayaan soo ururinayaa, waana soo noqonayaa, gaariga ayuu mooteeyey waana dhaqaaqay.

**Buurta Korkeeda iyo Bahalkii dadka cunayey!**

Meeshii ayaan Salaadii Maqrib ku tukadey, waqtigu waa mugdi xoogaa, dabaylana wey socdaan, todobadayadii waan isku ururnay, hal meel ayaan fadhinaa, wax yar ka dib waxaa nasoo weeraray bahal aanan anigu horay u arag, dadku qaar leeyihiin waa dhurwaa, waxaanu ku tuurnay dhagax iyo qori wixii aan heli karney, mase dhaqaaqayo, waxaaba ka go'an inuu caawa cashadiisa naga helo! Waxaan filayaa inuu meelahaan uga bartay waliimooyin badan, sidaa darteed, bahalku wax kasta oo aad ku tuurto ma tegayo, waa soo laabanayaa, waana weerar. Dadka qaar ayaa ooynaya, qaar waaba cabaadanayaan, qaarna  waa cararayaan, laakiin dadka kama fogaan karaan, waayo bahalka ayaa cunaya.

Xaggii hoose ee dadka iyo baabuurku naga jirey ayaan u cararnay, waxaanu gaarney wiilashii meydka ahaa iyo gabadhii oo uu gaarigu meel dhigay, alaabtii dadkana agtooda ku daadshey, uuna tegey, intaa haddaanu aragnay waxaan garanay ninkii inuu meeshan cidladaa nooga tegey, halkanina malaha ay tahay meeshii aanu ku dhiman lahayn dhamaantaya! Wax yar ka dib waakan bahalkii oo na daba socda.. war wax ku tuura, ku qayliya oo yur dhaha, maba tegayo..haddaanu dhinac isu buusnay, waxaa meeshii ku haray meydkii wiilasha. Mid ka mida labadii medka ahaa, ayuu dhurwaagii garabka dilaacsaday, oo muruqa kala baxay!! Wuuna naga tegey.

Waagii hadduu meeshaas noogu beryey,iyadoon waxba la seexan, waxaanu aragnay meydkii oo mid bahalku cunay, kii kalena ag yaal, dadkii kalana meelaha wada daadsan yahay, baabuurkiina tegey, wixii kaloo dhintay iyo kuwii hore midna ma aasi karno, kuwa taahaya iyo naftu kusii daba yartahay toona wax uma tari karno. Intayada xisku ku haray, ama dhaqdhaqaaq u dhimanyahay ayaa talo ku caddaatay waxaanu go'aansanay anagoo shan qof ah, inaanu bal iska socono, ilaa meeshii naftu nala gaarto, xagii buurtii uu timaamayey inaan fooda saarno, waana dhaqaaqnay, wixii kalena meeshii ayaan uga tagnay……

***




**30 June maalintii nafta laga quustay!**

Waxaa waagu noogu beryey sidaan sheegay buurtii yarayd ee dareewalkii tahriibku nooga tegey, anagoo is dhex naal, meyd iyo nool, bahalkuna xalay meydkii qaar ka gigay, dadka waxa noolina aaney hurda ledin, taaha iyo alalaadka ka baxaya inta naïf ku jirtana uunka joogaa maqlayey..

Annagoo shan ah oo intii dhaqaaqi kartey ah ayaanu qaboonadii meeshii kasoo dhaqaaqney waxaanuna u ruqaansanay xagga buurtii noo muuqatey oo meel fog ka bidhaameysa. Waxaanu ku qanacnay ninkii inuu meeshan cidladaa nooga tegey, intii marka uurku buki lahaa, adinku ha buko, meeshii nololi nala gaarto.

Waxaanu socono oo qorraxdii soo kululaataba waxaanu barqa dheer soo gaadhney buurtii ninku nagu lahaa magaaladu wey ka dambeysaa, laakiin markaanu dhakadeeda istaagney wax aan saxaarihii ahayni indhaha masoo celin!! Wax magaalo iyo deegaan u eg toona carriga kama dhowa kamana muuqdo. Halkaas ayaa rajadii yarayd oo nagu jirteyna ku go'day!

**Maxaa tala ah! Iyo kala bax!**

Shantayadii wada soconey waa qaybsanay, saddex wexey yiraahdeen: Annagu horay ayaan usii soconeynaa intii ay nala gaadho.. Anigu waxaan iri: Meeshii aynu dadka kaga nimi ayaan dib ugu noqonayaa, iyadaa nalaku ogaa..Waxaa naftu iigu sheekayneysey: Amaa ninkii dareewalka ahaa, ama gaarigii aad ka timaadeen, meeshii iyo dadkii kusoo noqdaa..Sidaa darteed waxaan ku adkaystay inaan noqdo, wiilkii kalena aniguu igu soo raacay. Sidaas ayaanu kusoo kala tagnay.

**Fuusta meel ka bidhaantay!**

Haddaan aniga iyo wiilkii ila socday, oo quraarad ku sita xoogaa (kaadiya) ilaahay haydin ka magan geliyee, qadar nus saac ah soo soconey, waxaa meel fog nooga muuqday Fuusto! Waxaanu is niri, amaa biyo ama wax nolol ahi meeshaas ka dhowyihiin, dabadeedna xageedii ayaanu u jihaysaney. Qoraxdu waa kulayl, anagana nolol badani naguma jirto oo naf la caari ayaanu nahay, laakiin rajada ayaanu xoogaa ku soconaa.. Cabbaar ka dib ayaanu soo gaadhney fuustadii, Subxaanallaah! Mise waa fuusta salka ka go'an, oo madhan, malaha muharibiintu ay meesha u dhigeen iney wadooyinka qaar calaamad ugu noqoto!

Halkaas markaanu mareyno naftii waa ka quusanay. Kulaylkii iyo gaajadii iyo harraadkiina meel xun ayuu naga gaadhey.

**Iska tag oo taleefankan iga qor..Halkaan ku dhimanayaaye!**

Sidaa waxaa igu yiri inankii ila socdey, oo meeshii fuustada agteeda ahayd ku dhacay, awalna aad u liitey oo iga darnaa! Wuxuu yiri: Walaalow halkan ayaan iskaga dhimanayaaye, taleefankan iga qor, oo hadaad noolato, Ilaahayna meel nabad kugu geeyo, dadkayagii u sheeg!

Waa mararkii iigu naxdin badnayd, ninkii aan wada soconey, oo meeshan geeridiisu iney noqoto ku cataabaya, anna aanan waxba qaban Karin, hadalna xitaa ku dari Karin.

Saxaaraha marka lamarayo, dhibaataduna halkaa gaarto ruux ruux kale wax u tari karaa ma jiro. Bani aadamka daciif nimadiisa iyo taag daridiisa ayaad arkeysaa. Waxaan ku idhi: Walaal miyir aan wax ku qoro maba hayee, Ilaahay wuxuu qadaro ayaa dhacaya, waanan ka dhaqaaqay anigoo is leh bal adna iska soco ilaa meeshey kula gaarto.

**Jaah wareer!**

Markaas aanu fuustada agteeda taagnayn oo raja beelnay waxaa naga luntay jihadii, meeshu waa saxaara nag ah oo calaamadna aan lahayn, waa qorrax kulayl cad ceedu indhaha kaa rideyso, waa gaajo iyo harraad aragtidii saamaysay! Waxaan garan weyney meeshii aan kaga nimi nimankii saddexda ahaa, iyo meeshii aan u soconey oo baabuurku nagaga tegey dadkuna joogey, jihada ay naga jiraan.

**Salaadii Sagootiga!**

Cabbaar haddaan socdey jihana garan waayey waxaan yaqiinsaday in anigana saacadaydii lasoo gaarey oo meeshan ay naftu igaga bexeyso. Sidaa darteed ayaan waxaan go'aansaday meeshayda aan taagnahay inaan 2 rakcadood ku tukado, Ilaahay baryo, naftu haddeey halkaas iiga baxdo. Qibladu jiha ay iga jirto ma garanayo, laakiin meeshaan u maleeyey ayaan u tukadey. 2 rakcadood oo aan is leeyahay waa kuwii kuugu dambeeyey oo macaan ayaan tukadey, Ilaahayna waan baryey dhexdooda iyo sujuudda.

**Mucjiso!**

Wuxuu Ilaahay badbaadinayo sabab iyo sabab la'aanba wuu ku badbaadiyaa. Markaan salaama naqsaday, oo salaama naqsiga sidaa uga soo jeestey waxaan hortayda si toosa indhaha ugu dhuftay caagad biya ah oo kuwa nus litarka ah oo afkeedu xaggayga qummaati ugu soo aadanyahay.! Waan rumaysanwaayey indhahayga.. wexey ii jirtaa masaafa 5 ilaa 7 mitir ah.. Waxaa hal mar igu soo degey farxad iyo nashaad aan caadi ahayn. Waan istaagey, caagaddii xageeda ayaan u dhaqaaqay, mise waa caagad biya ah o onus litar ah oo xiran..Waa cusubtahay lamaba taaban.. caagad ayar oo faaruqa ayaan watey, nus ayaan ku shubay oo cabbey, nuskii kale ayaan wiilkii ii dhowaa ee aan goor dhoweyd kasoo tegey kula soo noqday oo biyihii isagana xoogaa siiyey, intii kalena waan soo qaadnay aniga iyo isaga si aan dadkii kale wixii naf ku jirto ula gaarno..

**Dhimashdii oo sii badatay!**

Cabbaar ayaa jihadu naga wareersanayd laakiin Ilaahay fadligiis markii dambe wey noo toostay oo goor duhurkii xoogaa la dhaafay ayaanu soo gaarney meeshii dadku daadsanaa ee buurta yar hoosteeda ahayd. Biyihii yaraa ayaanu gabadhii nala joogtey oo keligeed ahayd iyo raga intii ugu liidatey afka ugu qoyney..Saaka markii aanu ka tagnay meesha waxaa yiiley 2 meyd ah

sidaan horay u sheegay. Hadda markaanu soo noqonay waxaanu ugu nimi 4 kale oo meyd ah oo dhalinyara Soomaaliyeed ah. Sidaa darteed geeridu ilaa hadda Soomaalida waa 9 qof oo gaajo iyo harraad u dhimatay.. Halka eritriyaankana dad badan oo aanan tiradooda garanayn ay ka dhinteen.

**Ferejkii Ilaahay oo furmay!**

Gaarigii shalay naga tegey sidaanu u malaynay ma noqon, oo cidla noogama cararin. Biyihii Jirigaanka ku haray ayuu gaarigii kale ula cararay, halkaasoo ay telephoneka Thurayada ah kula hadleen muharibiintii waaweynaa ee magaalada (Kafra) ee liibiya, wexeyna u sheegeen in dadkii dhamaanayo, oo gurmad deg dega lala soo gaaro. Halkaas ayaa 4 gaari oo biyo iyo cunto iyo gargaar badan wada ay kasoo direen. Wexey isugu yimaadeen subaxnimadiiba meeshii gaarigii kale, dadkii halkaas joogey wixii noolaa markey soo qaadeen, ayey anaga gaarigayagii oo biyo iyo cunto ka buuxa noo soo celiyeen.

Iyadoo Rajada dadku sii gureyso, ayaa abbaaraha 3 galabnimo gaarigii oo biyihii iyo cuntadii wadaa nasoo galay. Dadkii ayaa biyihii ku qamaamay, ilaa ay ganaca iney gooyso ku sigteen. Markaas ayuu dareewalku fikrad keenay.

**Biyihii oo dadka lagu rusheeyey!!**

Dadkii oo dhan ayuu wuxuu amray iney dhulka caloosha u seexdaan, iyagoo is dhinac jiifa. Ka dibna tuubadii uu dadka ku garaaci jirey, ayuu biyaha geliyey, wuxuuna ku dul furay dadkii oo jiifa sidii beer la waraabinayo oo kale! Arrinkaasu wuxuu dhaliyey in dadkii qaboobaan, oo nololi kusoo noqoto. (tuubadii dadka lagu garaaci jireyna manta waxbey tartay). Biyuhu wax walba noloshooda iney yihiin sidii Qur,aanku sheegayna wey caddaatay. Dareewalku markuu dadkii biyihii ku shubay shhahina u kariyey ayaa xoogaa naftu kusoo noqotay, laakiin dadka qaar ayaan biyaha si caadiya u cabbi Karin oo lagu siinayaa dhalada caruurta caanaha lagu siiyo, qaarna weli waa suuxsan yihiin, qaarna ma hadli karaan, waa dad u baahan baxnaana waqti dheer.

Intaa kadib ayaanu gaariga dadkii ku gurnay anagoo dadka liita qof qof u qaadeyna qaadeyna, meydkiina meeshii ayaanu uga tagnay oo ma aasi Karin, waxaanu haleelnay gawaaridii kale oo aanu meel isugu nimi, waa saddex gaari oo kale, qoladaasu meydkoodi wey soo qaateen oo halkan aanu isugu nimi ayaa lagu aasay. Nimanka gurmadka soo sameeyey ee muharibiinta waxaad moodaa iney kuwan dareewaladaa ee na wada ka jaga sareeyaan. Markii ay hawshii ogaadeena wey tageen waxaa haray labadayadii gaari iyo mid kale oo ay nooga tageen.

Saddexdii gaari mid waxaa la saaray dadka xiskii wareeray oo la qaqabanayo oo wax waashay oo kale ah iyo dad cel celiya si aaney gaariga isaga tuurin. Midna waxaa la saaray dadkii sakaraadka ahaa, iyo dad haya, kii kalena dadkii xoogaa roonaa. Ilaagalabnimadii ayaa

meeshaas la joogey, waxaana laga soo dhaqaaqay 5 galabnimo. Habeenkaas oo dhan waan soo soconey.

**GABADHII NALA SOCOTEY OO DHIMATAY! 1 JULY..**

Habeenkaas intaan soconey waxaa dhimatay gabadhii nala socotey. Waa gabadh reer waqooyi ahayd. Waa gabadhii aanu wadada dheer iyada iyo sideed kaloo dumara isla soo marnay wadada dheer ee saxaaraha laga soo bilaabo khartuum. Dadku markey waqti dheer safar soo wada galaan qisooyin badan ayaa dhex mara. Waa gabadhii habeenkii yaabka lahaa ee jabhada Daarfuur na heshay, ee ninka jabhadkaa gabdhahayaga damacu ka galay, diidey iney ag fadhiisato nin aan maxram u ahayn, markaanu ku badbaadineyney in gabar walba la qabo. Aniga iyo dareewalkii (adam) ee aan u baxshay (kooda ugu naxariis badan) ayaa gabadhii aasnay aroortii, wadada meel dhineceeda ah ayaanu ku aasnay, ilaahay ha u naxariisto.

Wexey ahayd arrin naxdin leh.. Waa gabadh Soomaaliyeed oo keligeed socota, maxramna la socon, oo tahriibeysa, yurubna u jeeda, dadkeedi iyo dalkeedi kasoo tagtey, laakiin geeridu wexey ku sugeysey saxaaraha Liibiya! Cidina ma oga meesha mawdku ku qabanayo, iyo berry wexey kasban doonto.

**(KHALID) LAGA SOO TEG!**

Labadii gaari ee nala socotey mid ayaa jabay, dadkii ayaa kii kale laysugu geeyey, anaguna waan ka horrayney, wiil Soomaali ah oo (Khalid) la oran jirey ayaa meeshii gaarigu ku jabay looga soo tegey, mar dambana warkiisa ma maqal, intaanu Liibiya joogney oo dhan waa la la'aa.

**1 July (Kafra) duleedkeeda!**

Saacaddu markey ahayd 11 subaxnimo ayaa gaarigii annaga na wadey soo galay magaalada kafra ee xadka Liibiya ku taal, si toosana nalooma soo geline, meel duleedka magaalada ah, oo beera ah, ayaa nala ku shubay, labadii gaari oo kalena casarkii ayey nasoo gaareen anagoo degney, halkaas ayaa dadkii daawooyin iyo faleebooyin iyo baxnaano lacagtooda ah lagu bilaabay.. Waxaanu nahay dad sidii xoolihii oo kale loo wado, oo meeshii la rabo lagu xeraynayo, ma dhaqaaqi karno, meel ma naqaan, waa beqeynaa, halkii ayaa nala dejiyey, oo la leeyahay, halkan ayaad joogeysaan ayaamo, inta Bani Qazi iyo Daraabulus laydiin qaadayo. Waxaanu isugu sheekayneyney markii loo fiirsho waxaanu soo marnay in hawshayadu soo dhamaatay, laakiin wax badan ayaa soo baxay…

***

**1 July iyo Beerta (kafra) Liibiya**

Alxamdulilaah Safartii aan kasoo bilawnay 20 May Khartuum, nalookuna sheegay (kafra) Liibiya inaanu ku gaari doono asbuuc ilaa 10 cisho, wexey nagu soo qaadatay 41 cisho, oo aan qayb ka mida wixii aanu soo marnay Socdaalkii Geerida idiinka soo sheekeeyey. Haddaanu manta intayadii aan dhimani (Kafra) Liibiya soo gaarney waa ilaahay mahaddiis.

Waxaanu ahayn 49 Soomaali ah, 12 ayaa wadada nooga dhimatay, 11 wiil iyo gabadh, wiilna jidkaa looga soo kacay, waxaanu halkaan kusoo gaadhney 36 Soomaali ah.

Dadka qaar ayaa baxnaano dheer u baahan, qaarna faleebooyin ayaa la suray, qaar daawooyin ayey soo gadanayaan, qaar cuntada iyo biyaha oo meeshan laga helayo ayey isku baananayaan. 12 maalmood ayaanu goobtaas dadka lagu tahriibiyo ee magaalada duleedkeedaa joogney. Nimanka nala wareegey oo muharibiintaa kuwii hore wey ka duwan yihiin.

**DAD SIDII XOOLA LOO KALA GADANAYO! ILEEN ADDONSIGU SIDAAN AYUU KU IMAN JIREY!**

Inta aanan wadada tahriibka soo marin ma fahmi kari jirin, side qof xor ahaa, adoon nima u geli karaa. Bani aadamka manta jooga iyo kii quruumihii hore joogey waa isla bani aadamkii. Qofku markii awoodu ka dhamaato, tabar uu waayo, meel uu ciirsi bidayana waayo, sidii qof indhala meel uu aado aanu garanayn, wuu is dhiibayaa. Qoolka adoonsiga si sahlan ayuu u qabatiimayaa. Waxaan la yaabi jirey: Sidee qof xor ahaa, inta dad dhacaan, suuqyada uga gadanayaan. Sida aan arkeynu oo sheekadaan aan ku aragnay ama aan ku arki doono, qofku siyaaba kala duwan ayuu adoonsi toosa ama dadban u gelayaa, una noqonayaa sida badeecada iyo alaabta la kala iibsado.

**Ma jiraan Soomaali Ilaa hadda xuduudaha Suudaan iyo Liibiya lagu adoonsado?!**

Jawaabta Su'aashaas qadhaadh waa haa! Wey jiraan dad ilaa hadda lagu haysto meelahaas saxaaraha agagaarkeeda, oo ariga la raacsado, ama beera lagu fasho, ama dumar ilma badan lagaga dhalay oo lagu haysto!!haddaad rumaysan karto iyo haddaadan rumaysan karinba!

**Yaa dadkaan ugu wacan dhibaatooyinkaas ay marayaan?**

Waa arrin falanqayn u baahan si loo xadido sida masuuliyadda dhibaatooyinkaan naxdinta leh look ala qaybsanayo, qofka laftiisa, ehelkiisa iyo Bulshada guud ahaaneed. Waxaanse la inkiri Karin iney noqoneyso masuuliyad la wadaago. Marka ugu horreysana qofku isagaa ficilkiisa iyo go'aamadiisa ka masuul ah, waxaa kaloo la wadaaga ehelada iyo asxaabta u sahasha ama ku dhiiri gelisa, waxaa kaloo qayb ka ah, dadka dalkii ay dadkaanu kasoo bara keceen inuu salka dhigo u diidan oo intey talada ku loolamayeen, ummaddii ka dhigay in dhimatay, in dhaawaca, in qaxday, in badaha iyo berriga ku rafaadday iyagoo nolol raadis ah.

**Nolosha Beerta Muharibiinta Kafra!**

Nimanka nala wareegey waa kuwo kale, laakiin wey isku xiran yihiin iyaga iyo kuwa suudaan iyo kuwa Daraabulis Libya jooga, iyo wadada u dhexeysa. Heshiiskii hore wuxuu ahaa, lacagtii nala kasoo qaaday in Daraabulis nala ku geynayo. Laakiin lacagtii aan bixinay waxaa noo dheerayd baaddii dhawrka jeer nala ka qaaday ee aan kasoo sheekeeyey.




Meeshani waa meel beer ah, geedaha hoostooda ayaanu ku noolnahay, buulal iyo jiingada yar yar ayey leedahay. Berked yar oo biyaha laga cabo ayaa jirta. Dadka bariis qalalan ayaa loo kariyaa. Qofkii lacagtiisa wax u dirsanaya magaalada wuu heli karaa. Biyuhu cariiri nagagama jiraan.Waa meel dadka lagu soo dejiyo lagana sii raro (Transit Station). Waxaa muuqata kumanaan dada iney soo mareen sanadihii u dambeysey, oo muharibiintu ay Soomaalida shaqa badan ka qabsadeen. Maadaama aan dadka turjumaan u ahaa, qoladan cusubina turjumaan ayey iga dhigteen, sidaa darteed xoogaa micaamil gaara ayaan helaa. Bakhaarkii cuntada qalalan u taaleyna waa la ii dhiibey.



Sawirka: Al-Jawfa oo ah meel biyood u dhaw Kufra, Libya. http://wps.prenhall.com/

**Heshiis cusub! addoonsi cusub!**


Magaalada Benghazi, Libya

Muharibiintu niman naxa maaha..Soomaaliduna dad wax ku cibra qaata maaha.. waxna isuma sheegaan.. qof walbii sanadahaas dhibta uu soo maray meelna kuma qorin, cidna ugama waramin.. xaalku dhibaataa lasoo maray ayuu ku dhamaadaa.. Waxaa fursad laga helay in Soomaalidu tahay dad is kaalmeeya, oo is xiriiriya qaraaba ahaan. Kumanyaalka wadadaan geerida soo mara waxaa lagu bartay lacago is daba jooga oo uga soo shubma Yurub iyo Amerika.. Kuwa socda wadada geeridana waxaa usoo hillaaceysa iney iyaguna mar Yurub tagaan oo sidaas ay lacag usoo diraan!Sidaa darteed dadkan kala iibsada Soomaalida ee xabsiyada saxaaraha uga furtay maba aaminsana Soomaalidu lacag ma heli karto.. Wuxuu si sahlan u oran: lacagtaas ayaa loo baahan yahay, haddii kale, halkaan ayaad ku xirnaaneysaa! Warku waa dhammaaday!

Nimankii Muharibiinta ahaa wexey yiraahdeen: Qofkii doonaya Bani Qaazi wuxuu bixinayaa $300. Qofkii raba Daraabulis waa $400. Dadkiina la hadla. Talefanka hal daqiiqo ayaa laguu ogolyahay. Lacagta ha idiin ku soo xawilaan saaxiibkaya Suudaan. Markuu noo soo sheego: hebel lacagtiisi waan hayaa, gaari ayaanu saareynaa.. Hadal ma jiro dadka qofkii lacag haysta iyo qofkii dalbanayaba isagey u taalaa.

**12 July u xir xirta Daraabulis!**

Maalintii bishu 12 July ahayd ayaa lacagihii la wada bixiyey. Qof walba $400 ayaa laga qaaday, aniga lacag igama qaadin maadaama aan bakhaarkii hayey turjumaanna ahaa. Lacagna maba aanan haysan. Waxaa la yiri is diyaariya waxaa laydiin qaadayaa Daraabulis. Wararkoodu marar badan waa been aan waxba ka jirin. In qola kale oo mooryaanta liibiyaanka ah oo weliba saraakiil sheegta in nala ka iibsanayo nalooma sheegin. Laakiin waa wadda Soomaalida tahriibtey soo wada martay, laakiin aan manta ka horow qofna qof kale uga digin, ugana sheekayn si qoraal ah, oo taariikhda u hadha.

**Soomaali ka qayb qaadatay dhibka!**

Waxaa kaloo jira niman Soomaaliya oo la shaqaysta qolada tahriibka ama ha noqdaan mukhalisiin tahriibka Soomaalida iyo kuwa Liibiyaanka ama Turkiga ama Suuriya ama Suudaan iyo meelaha la mida u dhexeeya ama xawaalada ka shaqeeya oo lacagaha u qabta muharibiinta, qaarkoodna wexeyba u arkaan iney Soomaalida tahriibeysa adeegya u hayaan ooh awl u fududaynayaan, laakiin sida dhabtaa qaarkood wexey wax la wadaagaan nimankaan tahriibka ugu xun ee Soomaalida gadata.

**Bahalkii (Ajdabiya) ayaa naloo gacan geliyey!**

Waxaa nala soo saaray 4 baabuur oo yar yar, ilaa magaalada bannankeeda, kadibna waxaa nalaku guray gaari iska rogi ah, beerka ayaa naloo wada jiifshey, dushana darbaal weyn ayaa nalaka saaray si naloo qariyo, meelaha askarta oo la marayo. Qofkii u baahda xaaja fudud gudashadeeda waxaa gacanta laga siiyey koombo yar oo uu ku shubo!

Waxaa nala keenay guri ku yaal magaalada (Ajdabiya) oo gudihiisa nalaku soo daadiyey, ka dibna afar afar ayaa baabuur yar yar naloo saaray, waxaanu u haysanaa, in naloo wado Daraabulis. Afartayadii ugu dambaysey intaan gaarigii nala saarin, ayaa nin ka mida qoladii na ilaalineysey afka nagu soo dhoweeyey, wuxuuna yiri: lacag ma haysataan aan hadda idin qaado oo Baniqazi idin geeyo! Waxaanu ku niri: lacag ma haysanno oo waxaan haysaney waa nala kasoo qaatay.. Ninkaasu runtii warka diirka noogama qaadin, laakiin wey ku caddayd warkiisa inaan Banqazi naloo wadin ee meel kale naloo qaadayo, laakiin annagu ma fahmin. Ma aanan ogayn inuu ninkaasu fursad fiican noo soo bandhigay oo aanu bahalka naloo wado kaga baxsan karney, laakiin qeybka iyo wixii dhacaya ma ogayn.

**Gurigii Bahalka!**




Gaarigii haddii afartayadii u dambaysey nala soo saaray waxaa nala kusoo shubay guri saddex dabaq ah oo ganjeel hore leh, shaqaale ama ilaalo badani joogto. Dabaqa saddexaad ayaa nala geeyey. Qol weyn ayaa nala soo geliyey, mise kooxdii oo dhan rag iyo dumar meesha ayey joogaan, xitaa kuwii shalay naga soo tegey, dhammaan 36 qof ayaan nahay kooxdayadan. Ninkan hadda naloo gacan geliyey waxaa lagu magacaabaa (Cali Baba). Ma garanayo inuu yahay magac beena iyo inuu yahay kiisi runta ahaa. Waxaa la yiri waa sarkaal ka mida ciidamada Liibiya. Soomaalidan yaaceysa ee socotada ah ayuu ka baayac mushtaraa kuna bahaloobey. Waa nin xoog weyn oo dheer, dhudhumada wuxuu ku leeyahay midabyo kala duwan oo ugu xardhan. Shaaruba weyn. Wajigiisa waxaa saran caro. Waxaad is oraneysaa markaad indhaha ka

qaado waa kuwa dadka cadaaba, naxariisina agtiisa kama muuqato. Aragtidiisa ayaaba dadka argagax gelineysa. Inuu sii argagax geliyana wuuba ugu tala gelayaa si uu dhaqsi lacagaha uga daadsado kadibna usii daayo oo kuwa kale usoo gashado. Waxaa hareerihiisa taagan ilaa dhawr iyo toban kale oo askartiisa ah.

**DHEGAHA IYO INDHAHA FURA!**

Wuxuu nagu yiri isagoo nala hadlaya: Qof walba waxaa laga rabaa $400 hadduu doonayo inuu meeshan ka boxo!! Haddaanu bixin, halkan ayuu ku xirnaanayaa, qolkan maaha, meel xabsiya oo guudka guriga ku taal ayaa lagu qufulayaa.. Waxaan qofkii u baahan telefoon inuu dadkiisi la hadlo siinayaa hal daqiiqo lacagtana halugu soo diro xawaaladda hebel ee Banqaazi (wuxuu sheegay xawaalad mageceed iyo nin Soomaaliya oo ay wada shaqaystaan).

**2dii inan oo hadashay maxaa ku dhacay? Fuustada qashinka ayaa lagu tuuray!**

Dadku indhohooda ayey wax ku arkaan oo juuq ma oran. Wuxuu noo soo saaray waraaqo afsoomaali iyo af carabi ku qoran oo ay qoreen dad soomaaliyeed oo horay meeshan usoo maray, waxaa ku qoran: war ninkaan cali baaba ah, hadaad u timaadaan wuxuu rabo siiya, haddii kale, meydkiina ayaa meesha lagu tuurayaa, ninkaan nin naxa maaha, annagaa idinka horreyney oo meeshaan soo marnay!! Waxaas iyo wax la mida ayaa ku qoran.. Wuxuu leeyahay: haah.. ma aragteen.!!

2 wiil ayaa wexey yiraahdeen: Lacag ma haysanno, waxaan haysanay iyo wixii naloo soo dirayba waa nalaga qaatay!!Maxaa ka yeersiiyey! Mid ka mida labadii inan ayuu qoorta kusoo dhegey.. wiil yar oo dhalinyaraa, oo 2 bilood rafaad iyo gaajo iyo tahriib saxaaraha kusoo jirey oo nafiba aaney ku jirin, ayaa ninkii xoogsadey ee daalimka ahaa dhulka dhigay, haraanti iyo feer, iyo garaacid ayuu isugu daray.. Markaasuu ku dul jog joogsadey sida kasha haruurka loogu tumo ayuu ugu tuntay!! Ilaa meel walba dhiig ka yimi, oo lays yiri waaba dhintay.. markaasuu lugta intuu ka qabtay sida neef ariya wuxuu ku jiidey jaran jaradii saddexda dabaq ilaa dhulka hoose..waxaanu sii maqleynaa madixiisa oo jaran jarooytinka ku garaacmaya marka uu jiidayo.. Innaa lilaahi wa inaa ileyhi raajicuun.. Ma hadal baa yaal qof lacagtii soo bixiya iyo qof taleefanka qabsada ayaa la noqday! Wiilkii uu jiidey siduu u jiidayey isagoo miyirku ka tegey ayuu guriga bannaankiisa fuustada qashinka oo taalla ku tuuray!!

Wiilkii kale intaanu bahalku ku soo noqon ayuu balakoonka ka boodey oo dabaqa hoose ku dhacay, mase carari karo waa guriga gudihiisa askartiina waa joogtaa. Feeraha iyo madaxa iyo garabka ayuu ka jajabay, waana miyir belay, isagana qashinka ayuu ku tuuray. Wiilashii meesha waxaa ka qaaday boolis oo cisbitaal geeyey, laakiin meel ay garan karaan, iyo xitaa gurigii lagu diley magaalada iney ka gartaan suurtagal maaha. Muddo ayaa la daaweeyey aakhirkiina ilaahay waa ka kiciyey.. Intayadii kale waxaanu dirnay taleefanno lacag naloo soo diro, qofka markii lacagtiisu banqaazi ninka Soomaaligaa soo gaarto ayuu u soo sheegaa hebel lacagtiisi waan hayaa, markaasuu gaari ku daraa ilaa Daraabulis. Sidaas ayaanu afar beri ugu afduubnayn bahalkaas, kadibna Ilaahay naga soo furtay, markii eheladii lacaga madax furasha ah noo soo direen…

Lacagtii la ii soo diray xoogaa iiga hartayna ninkii soomaaliga ahaa ee Baniqazi ayaa iga lunsaday, wuxuuna yiri: waa cuntadii iyo cabitaankii intii guriga aad joogtey! Daalimiin, ilaahay ka furatay! Waa xarig iyo afduub xisaabtaada ah. ……

***

**16 July – Banqaazi**

Ilaahay Subxaanahu watacaalaa wuu naga soo bad baadiyey ninkii (bahalka) Liibiyaanka (Cali Baaba) ahaa ee Kornaylka lagu sheegay, markaad eegto dadkaan Soomaalida ka ganacsanaya xisaabaatkana isku dar darto waad yaabeysaa. Masalan Khartuum markaan kasoo tegeyney qofkii waxaa laga qaaday $800 in Libya la geynayo. 39 x 800 = US $ 31,200. Masalan ninkan Mujrimka ah markuu na gadanayey: 36 x 400 = US $ 14,400. Qoladii Kafra naga soo Qaaday ee ninkan noo keentay: 36 x 300 = US $ 10,800. Intaa waxaa dheer wadada Askartii Suudaanta, Jabhadii Daarfuur, iyo Dareewaladii Muharibiinta ahaa, waxaasoo dhan (Mooryaan) isku xiran khartuum ilaa Kafra ilaa Banqazi ilaa Daraabulis ayaa Kumanyaal Soomaaliya lagu daabulayey sanadihii u dambeeysey.

Maanta oo bishu 16 July tahay ayaan soo gaarey Banqaazi, kadibna baabuur kale ayaan kasii raacay, warqad yar ayaa lagaaga soo samaynayaa Banqazi oo aad ku gudubto.

**17 July Darabulis**

Maanta oo bishu 17 July tahayna ugu dambayntii waxaan soo gaarey Daraabulis wax kasta oo la soo maraba. Dadka qaar ayaan meeshaan soo gaarin. Socdaalkuna weli waa dheeryahay oo safartii doonyaha iyo badda ayaa laysu diyaarinayaa hada ka dib.

Daraabulis badanaaba waxaa laga soo dhacaa meel la oran jirey (Safaarada Soomaalida). Waxaad ugu imaneysaa subixii haddaad kusoo jarmaado kumanyaal Soomaaliya oo meesha dhooban oo wadada tahriibka badda loogaga gudbayo dhinaca Yurub qal qaalsanaya. Waraaqa safaaradda laga dhamaysto, lacaga lagu soo xawishu, mukhalisiinta oo qof walbaa meeshaas kala heshiiyo, iyaguna kuwa Liibiyaanka oo wax tahriibinaya u gudbinaya.




Daraabulis (Ṭarābulus) ama طرابلس waa magaca carabiga ee Tripoli
Fogaanta ay mareen tahriibayaasha sheekadu ku saabsan tahay
ka soo bilow Khartuum iyo Daraabulis waa qiyaastii 3,500 km

Qofba hawshu si ayey ugu dhamaataa, dadka qaar ayaa bila jooga, qaarna ayaamo, qaarna bila ka badan oo sanado ayey ku qaadataa. Kharashkii haddaad haysato mudado wey soo yaraan kartaa. Aniga wexey igu qaadatay hal asbuuc. Waxaan Daraabulis joogey 17 July ilaa 25 July. Habeenkii 25ka ayaanu kasoo baxnay.

**Bada side loo soo Maraa!**

Dadku wexey u baxaan koox koox. 30 ama 40 ama 50 kadibna waxaa loo fiirinayaa doonta ay qaadan karaan. Doonta iyaga ayaa kaxaysanaya. Nimanka wax tahriibiya ee Liibiyaanku wexey soo diyaarinayaan Doontii oo kuwan caagga adag ah (Fibre glass) ama kuwa aaryada lagu buufiyo, oo matoor yar gadaal lagaga rakibo, shidaalkii oo jirigaama ku jira, xoogaa raashin fudud iyo biyo. 2 ama saddex ka mida kooxda ayaa tababar mararka qaarkood lagu siiyaa maalin ka hor sideey doontan yar u wadi lahaayeen.



Doon ay saaran yihiin tahriibayaal oo ka tegey Soomaaliya, Sawirka AFP 2002

Waxaa kaloo lasiiyaa buusalada jihada tusineysa (Compass) ama GPS. Kadibna habeen bartamihiisa ayaa meel xeebta ah la keenaa, waa lagu guraa, macasalaama, waa idinkaas, idinka iyo badda weeye ilaa talyaaniga gaartaan. Halkaas weeyey meelaha ugu badan ee iyadana lagu dhamaaday. Waayo dadkaan waa koox laysu keenay oo wax walbaale ah. Aqoonna aan u lahayn shaqadaan badda. Doonyahaan yar yar maaha kuwa loogu tala galay dal ilaa dal iney isaga gudbaan, ama safar sidaasa u adkaysan kara, waa tahluko. Dadka la saarayo waa xad dhaaf, doon yar oo 4 ama 5 qof loogu talagalay in lagu kalluumaysto, ama maraakiibta lagaga soo dego ilaa xeebta oo saxiimada yar yar ah, ayaa 30 ama 40 qof lagu aruurinayaa taasina shaki kuma jiro iney la degeyso, ilaahay oo ku badbaadsha mooyaane. Waana sida dhacda maalin walba iney badda kula degto.

Dhibka kale waa xoogaada yar oo raashinka iyo biyaha ama shidaalka wexey ku soo qiyaasayaan maalin keliya iney ku gudbaan. Laakiin waxaa dheceysa in jihadu ka wareerto, ama mawjado ku kacaan, ama matoorku xumaado, oo badda la saarnaado asbuuc ama 2 asbuuc ama 3 ama bil ama kaba badan, oo markaa dadku is cunaan, qaar iyagoo nool hilibkooda la cuno, ama caruur hadey la socoto la qasho, ama qof sii jeeda qof ka dambayaa ilkaha gashado oo cad ka ruqsado!! Maaha wax khayaali ah, waa wax dhaca oo dadka tahriibey qaarkood sheegeen.

- 2003: SOOMAALIDA KU GEERIYOODEY BADDA U DHEXAYSA LIIBIYA IYO TALYAANIGA http://www.somaliatalk.com/2003/oct/25oct103.html
- 2002: SOOMAALI TAHRIIB AH OO KU GEERIYOODEEN SAXARAHA U DHAXEEYA LIIBIYA IYO SUUDAN
- 2001: SOOMAALIDA KU GEERIYOODEY BADDA CAS EE U DHEXAYSA SOOMAALIYA IYO YEMEN




Sawirka: Oct 24, 2003: Qaar kamid ah meydka marxuumiin Soomaaliyeed oo ku geeriyoodey badda u dhexeysa Liibiya iyo Talyaaniga

Aniga kooxdii aan ku heshiiney inaan is raacno waxaan ahayn 27 qof. Waa inaad iska dhex heshaan dad mar uun bad arkay ama ku dabaashay si ay iyagu naakhuudayaalka doonta u noqdaan. Waxaanu iska dhex helnay wiilal yiri: Dekedda Dabiicigaa ee Ceel Macaan (Muqdisha Agteeda) ayaan saxiimadahan oo kale mar mar alaabta maraakiibta kaga soo dejin jirney, ma wadin laakiin waan arki jirey iyagoo la wado. Waayahay, niman fiican ayaad tihiine, idinkaaba doonta inoo wadaya. 3daas qof iyaga lacag lagama qaadin. 23 qofna waxaanu bixinay qofkiiba $900. Hal qofna $800 ayuu baxshey, boqolkii uu waayey waa loo dhaafay. Nimankaa Muharibiintaa wexey kooxdayada ka qaateen: US $ 21,500.

Marka aad aragto ilaa 2000 qof wax ku dhow ama ka badan oo maalin walba dhooban meesha safaaradda lagu magacaabo, waxaad garan kartaa shaqada meesha muharibiinta uga furantay iyo (business) ka ka socda inta uu la egyahay.

**25 July ayaanu doonta soo fuulnay!**

Habeenimadii 25 July ayaa saq dhexe waxaa nalaku soo ururshey meel xeeb ah oo magaalada ka durugsan. Geeda xeebta u dhow hoostooda ayaanu nimi oo sidii xero ama (Camp) dadka lagu tarxiilo ah. Doontii ayaanu meesha kasoo jiidney ilaa badda agteeda la keenay. Alaabtii iyo jicsinkii yaraa ayaa lagu guray. Doontu waa mid yar, matoorkiina gadaal ayuu ka lushaa. Kadibna badda ayaa la dhigay. Sideed qof dhinac ayey fariisteen. Dhinaca kalena 8. Saddexda wadeysana gadaal. Intii kale iyo alaabtiina dhexda ayaa la dhigay.

Doontu dadka waa ku cariiri. Jirigaamadii biyaha iyo shidaalka ayaa dhex yaal. Sidaas ayaa nalagu sagootiyey, waxaana la yiri caawa inta ka hartay iyo berri ayaad soconeysaan, berri galab ama habeen dambe waad joogtaan xeebta Talyaaniga.

Dadka tahriibka gelaya mar mar waxaad is leedahay xisku waa ka maqan yahay, ama Yurubta usoo hillaaceysa iyo lacagaha laga soo dirayo ayaa wax walba illowsiineysa. Qofka bani aadamkaa haddii uu dareemayo – haba noqdo dareen been ah – dhibkan in raaxo ka dambayso

wax walba oo dhiba wuu u dul qaadanayaa. Sidaa darteed ayaa dadka iimaanku qalbigooda buuxshey ay dhibaatooyinka adduunka ugu dulqaataan, ama si kasta oo iimaankooda loogu dhibo ama loogu cadaabo ay u adkaystaan, sababtoo ah waxaa uurkooda kasoo butaacaya il furan oo iimaanku kasoo burqanayo.

**Dadka tahriibku mexey ugu adkaystaan dhibkan iyo cadaabkan?**

Dhibaatooyinkaan tahriibka dadku markaan u fiirsaday wexey uurka gashteen oo cabbeen raaxo ayaa kaaga dambaysa. Raaxadaas ay iyagu ku qanceen waa inaad heleyso: nolol qabow, shaqa fiican, lacag caydh la yidhaahdo oo si bilaasha kugu soo geleysa, guri iyo cunto marka aad ugu yartahay lagu siiyo, lacag aad shaqaysato ama dadkii kaa dambeeyey usoo dirto, daara qurux badan iyo jardiinooyin cagaaran, baabuur iyo tareenno iyo diyaarado iyo doonyo dalxiis. Intaba waxaa kasii muhiimsan baasaboor aad adduunka meeshaad doonto aad ku mareyso. Miyaadan arag hebel iyo hebel, shalay ayuu naga tegey, maantana Sweden ayuu kasoo hadlay! Hebelna Norway oo ah adduunka wadanka ugu nolol sarreeya ayuu taleefan kasoo diray. Sidaa darteed dhib malehe iska adkayso waa ayaamo.

Sidaa darteed dadka tahriibka ku jira waxaa ka mida dad dukaama haystey oo nolol fiican ku noolaa oo waxaba soo xaraashay! Waxaa ka mida rag shaqooyin fiican oo biilkooda ay ka helaan kasoo tegey. Nin ka mida ayaa wuxuu ii sheegay, isagoo Suudaan jooga, shaqa fiican haysta, biilka reerkiisa iyo ka badanba ka hela, xaas iyo guri leh, iska qabow, la yaqaan oo dad marti geliya, ayuu wuxuu arkaa maalin walba dadkii wadadan ku dhaafay oo kala soo hadla Ingiriis, Norway, Sweden, Switzerland iwm.

Hal habeen ayuu shaqadii iyo adduunkii iyo noloshii u ku jirey ee qaboobayd lugta ku dhuftay, shaqadii waa ka tegey isagoo la leeyahay war hebelow jog xagee u socotaa lacagtaa laguu kordhinayaa, xaaskiisi ayuu gacanta soo qabsaday, wiil yar oo u dhashay markaasna tuurtuu saartay, gabadh qaraabaa oo la joogteyna wexey tiri xagee la iiga tegayaa haddii yurub la aadayo, iyana waa raacday, halkaas ayuu isaga iyo 2 haweena iyo ilma yar, socdaalka geerida ugu soo jeexeen, Suudaan, Chad, Niger, Saxaaraha weyn ee Niger iyo Algeria u dhexeeya, Algeria, Liibiyana wuxuu kasoo galay dhanka waqooyi galbeed, kadibna badda, kadibna talyaaniga. Wuxuu ii sheegay iney ku dhowaadeen iney ku halaagsamaan Saxaaraha weyn, laakiin ilaahay bad baadiyey. Waxaan ku idhi: intaad soo martay haddaad ogaan lahayd in la marayo, masoo jeexi lahayd? Wuxuu yiri: wallaahi hadaan si wanaagsan u ogaan lahaa waxa la marayo inaanan maalin ku fekereen, laakiin qof walbaa isagoo indha la' oo baasaboorka guduudan ee yurub usoo hillaacayo ayuu badda iyo saxaaraha isku soo tuuraa.

**Doon yar iyo Badweyn..**

Badweyntii iyo sixiimadayadii yarad ayey noqotay. Mawjada gurxamaya ayaa kolalka qaarkood doonta yar kor u tuuraya heer ay ku sigato ineyma rogmato waxa saran oo dhammina badda galaan. Marna baddu waa xawaal oo waxaad moodeysaa gogol xariira oo la fidiyey! Ilaahay sancadiisu cajaaib badanaa.

Habeenkii markaanu soconey iyo subaxdii intii hore ayaa jihadu naga luntay, badweyn ayaan joognaa berrina meelna noogama muuqdo.

**MARKAB ILAAHAY NOO BIXIYEY!**

Annagoo badweynta ku meeraysaneyna, jiha aan aadnana garan la' buusaladiina naga fariisatay, ayaa ilaahay markab weyn oo socda noo bixiyey. Meel dheer ayuu naga maray, waayo hadduu noo soo dhowaado badda siduu u kala jeexayo ayaaba dhinac noo rideysa. Kadibna wey noo istaageen, waxaanu ku niri: Soomaali tahriiba oo lunsan ayaanu nahay.Ninka Kaptankaa ee markabka watey nin naxariisi ka muuqato ayuu ahaa. Wuxuu yiri: aniga idin ma dabi karo oo waa lay qabsanayaa, laakiin isoo raaca, waxaa inoogu dhow dekedda maalda oo aan u socdo. Idinku dekedda masoo geleysaan, badweynta ayaad joogeysaan, saacado ayaan joogayaa, kadibna waxaan idinku toosinayaa wadada Talyaaniga. Raashin iyo biyo iyo cabitaanna wuu na siiyey.

Markabkii ayaanu daba galnay, cabbaar markaan soconey ayaa waxaa meel fog ka muuqday berrigii maalda. Wuxuu yiri halkaan jooga, wuuna hormaray, duhuradii mar ay tahay ayuu nagu soo noqday, wuxuu yiri isoo raaca, waa daba galnay casaradii mar ay tahay, ayaa waxaa noo soo bidhaamay berri kale. Wuxuu nagu yiri: Berrigaas fog ma u jeedaan, waa xeebtii talyaaniga, waa idinkaas, yaan laygu kiin arkin, badda ayuuna xoog u jeexay.

Dabeecada iyo naxariistu waa hiba ilaahay dadka u kala qaybshey. Maraakiibta wexey u badan yihiin kuwa aan dan ka yeelan ama u joojin dadkaan tahriibaya, ama biyaha ku gediya, amase doonta yarba badda ku dejiya, laakiin qaar naxariis leh ayaa jira sida ninkaan anaga ilaahay noo bixiyey, sidaas darteed aanan badda dhexdeeda ku baabi'in, ooh al maalin keliya ay nagu qaadato inaan soo gaarno xeebta Talyaaniga oo qasadka safartu ahayd, anagoo nabad qabna.

**Waa 26 July iyo Xeebtii Yurub (Talyaaniga) oo Muuqata**

Wax yar markaan soconey waxaan ku soo dhowaaney xeebihii Talyaaniga xoogaa ka dibna waxaa na dul heehaabayey dayuuradaha qumaatiga u kaca ee (Helicopter)ka loo yaqaan, kadibna waxaa noo yibi markab yar oo kuwa askarta xeebaha ee Talyaaniga, halkaasoo nala kasoo guray doontii yarayd, berriga ayaa nala keenay, gaari shabaqle ah ayaa nalaku aruurshey, kadibna waxaa naloo soo gudbiyey xerada qaxootiga badda soo jeexay lagu aruursho.

Ugu dambayn waxaanu soo gaarney Yurub, Socdaal dheer oo qaatay 2 bilood iyo 6 cisho ka dib, marka laga soo bilaabo maalintii aanu kasoo dhaqaaqnay Khartuum. Dadkii aanu wada soconeyna, qaarna waan kasoo sheekeeyey oo qabriyadoodu wexey noqdeen Saxaaraha Liibiya, qaarna waa la waayey, qaar waxaanu ku kala harnay intoodii badnayd Daraabulis, Liibiya, oo dadka qofba si wax u qorshaysto ama u qal qaalsado. Socdaalkii geerida Soomaaliya ilaa Yurub intiisi ugu muhiimsanayd ee anigu aan lasoo kulmay halkaas ayey ku dhamaatay.. Inta ka dambaysa waa yurub wixii aan kala kulmay iyo hawlaha cusub ee bilawday, inaan iyadana wax ka iraahdo. Dabadeedna wixii cibrooyin iyo duruus ah, ama tacliiqaadka dadka kale ee soo

tahriibey, ama akhristayaasha Soomaaliyeed ee dareenkooda ka muujiyey Qisadan ayaa Qoraagu soo koobi doonaa inshallaahu tacaalaa…

***

**Xerada Qaxootiga (Kaampka) Talyaaniga 26 July**

Xerada nala keenay wexey u egtahay meel Iskuul ahaan jirtey, waa guri weyn oo dabaqya ah, dadkii naga horreeyey waxaan maqlay meel kale oo gurya yar yar leh ayaa la geyn jirey, kadibna halkan ayaa loo soo bedeley. Waxaa xerada jooga dad ilaa 300 qof ah, Soomaali iyo Eritriyaan ayaana u badan inkastoo Afrikan kale ay joogaan. Si kastaba dhibaatooyinka, ama takoorka xeradu ha ahaato, laakiin dadka qaxootigaa badankood wexey dareemayaan, ugu yaraan, iney biya ay cabbaan iyo cunto iyo meel ay jiiftaan haystaan. Iney dhibaatooyin badan oo wadada ay ku soo mareen xaalkoodu hadda ka fiican yahay. Laakiin wadankooda noloshey ku jireen, haddii cajalka dib loo celin lahaa, maka fiicantahay? Bani aadamku ma jiif iyo cunto keliya baa? Arrinkaas weeye kan qofka fekerkiisa ku soo dhacaya, markuu meeshan uu joogo qiimayn saaro, welina hawsha fari kama qodna.

Isla markiiba waxaa nala ka qaaday faraha, sawiro, iyo waraysi kooban, kadibna waxaa nala geeyey, jiifka iyo cuntada. Ayaamihii ka dambeyyeyna waxaanu mareyney waraysi iyo maxkamad, qofba in ayey ku qaadataa, inta la siinayo waraaqaha aqoonsiga ama ogolaanshaha joogidda qaxooti. Anigu waxaan xeradaan ku jirey 4 bilood, 26 July ilaa iyo 24 November. Waraaqaha aqoonsigana waxaa maxkamaddu ii xukuntay oo lay siiyey 17 November, taasoo ii suurta gelineysa inaan magaalada si caadiya u geli karo, ama meel kale u safri karo.

**Sheekada Faraha (Finger Prints)**

24 November ayaan u duulay dalka Switzerland oo markaa dadka intiisa badani aadayey, maxaa yeelay, markaas ayuu ku biiray Bahda Dawladaha Yurub ee ka midaysan xagga Fiisooyinka ee loo yaqaan (Schengen) waxaana dadku quudaraynayeen iney agtiisa waraaqaha iqaamadda ka keli karaan, maadaama faraha aanu la wadaagin Talyaaniga, Laakiin Nasiib darro Dadka intooda badan wey ku hungoobeen, dadna waa la siiyey, oo mar marka qaarkood iyagoo qofka farihiisa haya ayey siiyaan aqoonsi cusub, sida bandanna markiiba farahaagu markey soo boodaan ayaa lagu garanayaa waana laguu diidayaa.

Dadku badanaaba Talyaaniga kuma hakadaan, wexey u dalandoolaan wadamada kale ee Yurub, haba ugu badnaato Holland oo ay (Xerya badan) kaga jiraan Qaxootiga tahriibku, iyo Scandinavia siiba (Sweden) iyo (Norway).

Sheekada faruhu waa midda ugu badan ee ay hadalhayaan dadka Tahriibka Yurub kusoo galay. Labada meelood ee ugu badan ee dadka Tahriibku kasoo galaan waa (Talyaaniga) iyo (Griiga). Dadka dhinaca Liibiya badda kasoo gudba waxaa u dhow talyaaniga oo ay kasoo dhacaan wixii nolol kusoo gaaraa. Dadka dhinaca Suuriya iyo Turkiga soo maraa wexey kasoo dhacaan Griigga oo Turkiga dhinaca ku haysa. Labada wadanba maadaama ay Bahda Yurub ka mid yihiin, dadka

faraha ayaa markiiba la qaadaa, dabadeedna meel kasta oo yurubta kale ah Waraaqa kama heli karo, farihiisa ayaa meel walba yaal, wuxuu jaanis u helayaa haddiiba loo ogolaado Joogitaanka, Talyaani iyo Griig, oo labada midna aan wax laga cunin. Sidaa darteed ayaad arkeysaa Soomaali badan oo Yurubta daadsan oo leh: Faraa layga helay, waan dhibbanahay, wax joogitaan ah iyo shaqo toonna kuma haysto wadanka aan joogo, xera qaxooti ayaan ku jiraa.



**FARAHA KUWA ISKA GUBAY!**

Had iyo jeerba waxaa la sheegaa dadka Soomaalidaa in maskaxdoodu ku dheerayso dhanka wax is daba marinta. Naftoodana ay tahluka u geliyaan, ama wax badan oo indha adayg ah ku kacaan, taasoo u baahan buug gaara in laga qoro, wexey hindiseen wax yaaba ay kaga fakan karaan faraha, waxaana ka mida sida la sheegay in faraha ay dabka geliyaan, ama feera ku gubaan, ama waxyaaba kale u adeegsadaan si loo bedelo faraha laftooda oo marka laga qaado ay ugu ekaan waayaan kuwii horay looga qaaday.

**SOCDAALKII GEERIDA – SIDEE LOO ARKAY?**

Qoraaladan Socdaalka Geerida Soomaali ilaa yurub, dad badan ayuu hurguma kusoo kiciyey. Waxaan filayaa iney tahay Mushkilo joogta guri kasta oo Soomaaliyeed haddii la baaro. Sheekadan intaan qorayey iyo ka horba waxaan la kulmay dad badan oo ku firiqsan wadamada Yurub, kuwaasoo qaarkood si kooban iigu dulmaray dhibaatooyinka ay kala soo kulmeen Tahriibka iyo sida aaney u arag (Jannadii) loogu gacan haatinayey! Dad kalena wexey fariimo ay ii soo qoraan ku muujiyeen dareenkooda ku aadan Socdaalkii Geerida, labadaa iyo wixii kaloo aan ka hayo Socdaalka Geerida guud ahaan, waxaan jeclahay inaan qisadan gabagabadeeda ku xuso.

**Oslo – Norway**

Norway wexey ka mid tahay meelaha ay dadka tahriibka soo gala niyadda ku hayaan, haddii ay fursad helaanna usoo gudbaan. Waxaa ku yaalla xeryo ay ku jiraan Soomaali badan oo sugaya xukunka waraaqaha joogitaanka dalka. Dadkaa Soomaaliyeed ee dhibaataysan siyaaba kala duwan ayey marar badan iila soo xiriiraan, hanoqoto fool ka fool marka aan booqashooyinka dacwadeed ku tago dalalka Yurub, ama ha noqoto xagga fariimaha internetka iyo taleefanka. Waxaan ka xusi karaa: Maalin maalmaha ka mida, anoo Salaadda Cishe tujiyey Masjidka Tawfiiq ee Soomaalida eek u yaal Caasimadda Norway Oslo, markaan salaadda ka salaama naqsannay waxaa ii yimi nin dhalin yara ah, oo isoo hor fariistay, waxaa ka muuqata diif badan oo weli aan ka dhecin siduu safarta dheer u soo galay, Wuxuu igu yiri (( Sheekhow Ilaahay dartiis ayaan idiin jeclahay adiga iyo wadaadada dadka wacdiya Sida Sh. Mustafe iyo Sh Umal, iyo qeyrkood. Waxaan ka mid ahay dhalinyarada Tahriibka Soo gashay, dhibaatooyin badan oo aanan soo koobi Karin ayaan lasoo kulmay. Waxaan soo maray Soomaaliya, Jibuuti, Eriteriya, Suudaan,

Liibiya, Talyaaniga, haddana waxaan imi Norway, waxaanan ku jiraa xero qaxooti, welina waraaqo layma siin, Ilaahayna ii barya inuu ummuuraha ii fududeeyo, dhalintana uga diga dhibkaan soo marnay oo kale..))

**Holland – Amsterdam, Tilbrug**

Dalka Holland wuxuu ka mid yahay meelaha ugu badan ee qaxootiga tahriibku soo galaan raja ka jirta inuu waraaqaha joogitaanka bixiyo awgeed. Magaalada Amsterdam ee ah iridka ugu weyn ee Netherland laga soo galo, gaar ahaan garoonkiisa Caalamigaa ee Schipol, waxaa meel garoonka u dhow ku yaal Xafiiska Jaaliyadda Soomaalida ee marka la soo gaabiyo loo yaqaan: SOMVAO oo u taagan Jaaliyadda Soomaalida ee Amsterdam. Dhawr jeer ayaan Booqday Xafiiska Jaaliyadda Muxaadarooyinna ka jeediyey, masuuliintana la kulmay. Waxaa gacanta ku haya hadda Dhalinyaro Soomaaliyeed oo dalka Netherland deggan, oo dadaal aad u fiican wada, xagga adeegga Bulshada Soomaaliyeed eek u dhaqan Amsterdam ama guud ahaan Netherland. Beryahan Dambana wexey dadaal ugu jirtaa Bulshada Netherland guud ahaan in Masjid weyn iyo Markas Islaamiya laga taago Magaalada Amsterdam, dadaalkuna meel fiican ayuu u marayaa intaan ka warhayo.

Wexey ii sheegeen Dhalinta Soomaaliyeed ee Jaaliyadda joogta, sanadkii hore markaan tegey Amsterdam, maalinta ugu yar waxaa soo mara: 10 ilaa 20 qof oo Soomaaliya oo qaxootiya oo Amsterdam kasoo dega, toosna u yimaada, xarunta Jaaliyadda, waayo waa cinwaanka keliya ee lasoo siiyo, markey kasoo kacayaan Talyaaniga ama Griiga, ama meel kasta oo ay soo maraan, waxaa jira qaar soo mara wadamada bariga yurub, sida Romania iyo Ukraine. Dadkaasuna marka ay noo yimaadaan, waa inaanu meelaha ay u socdaan wadanka gaarsiino, trainka u goyno, u tarjumno, wixii kaalma ah u fidino. Ilaahay ajar haka siiyo wexey hayaan nimankaasu shaqa aad u weyn.

Sidoo kale shirweyne lagu qabtay Magaalada Tilbrug oo ay soo abaabuleen ducaadda iyo Jaaliyadda Soomaaliyeed ee Netherland, dadka ugu badan ee kasoo qayb galay waxaa ka mid ahaa dadkaas xeryaha qaxootiga ku jira. Qaar ayaa wexey ii sheegeen, dabarkooda in cad hiliba laga goostay iyagoo badda saaran muddo dadkiina gaajo darteed is cunay!!Cunid hilibka bani aadamka oo dhaba oo aan sheeka ahayn!!Waxaan is leeyahay dhalinyarada Suxufiyiinta ah ama wax qora, kama qarinaayo, haddii ay himmad u hayaan, sheekooyin dhaba oo xaqiiqa ah, oo aad u fara badan, ayuu ka heli karaa, qofkii taga xeryahaas qaxootiga, oo waraysta dadka dhibaatooyinka tahriibka soo maray, oo mid walba qisadiisu kan kale ka darantahay, halkaasna buugaag aad u fara badan ayaa kasoo bixi karta oo dhaxal taariikheed u noqon kartaa facyaasha Soomaaliyeed ee soo socda, ama Soomaaliya haddeey maalin degto oo caga dhigato, sida aan Ilaahay ka rajayneyno, wexeyna ka mid tahay ayaamihii Qur'aanku inna faray in la xasuusto cibro iyo waano darteed.

**London, UK**

Wadanka Ingiriiska waxaa jooga Jaaliyad Soomaaliyeed oo aad u ballaaran, in badan oo ka midana waa dadka tahriibka soo maray. Nin dhalinyarada Soomaaliyeed ka mida ayaa igu yiri,

markaan bilaabay qisadaan inaan qoro: Hadaba anigana I dhegeyso, sheekhow..Waxaan kasoo Bilaabay Soomaaliya..Nairobi Kenya anoo fiican ayaan tahriib galay ilaa South Afrika..South Afrika anoo iska fiican oo shaqaysta, Hillaaca yurub ayaa indhaha iga maray, Tahriib ayaan isku soo qaaday, Angola, Zimbabwe, Zambia, Congo, Malawi, Niger, Mali, Algeria, Libya, Talyaani, Ingiriis, Intaas aan soo maray dhawr iyo toban kun oo doolar waa iiga baxday, xabsi ayaan intaasoo jeer galay, xanuun iyo rafaad badan ayaan la kulmay, marar badan ayaa reerkayago iga quusteen, una haysteen inaan meelahaas meel ka mida ku dhintay, macaanka aad aragto iyo xanuunka I asiibay wuxuu iga soo raacay safartaas dheerayd iyo rafaadkeedi. Doonta markii aanu soo fuulnay qof walbaa wuxuu haystaa mindi dheer oo uu isku difaaco, waxaa dhici kartaa cariiriga keliya qof inuu badda kugu tuuro. Haddana rafaadkaas ka dib Ingiriiska markaan soo gaarey 7 sano ayaan waraaqa la'aan ahaa oo waxba qabsan kari waayey meelna u dhaqaaqi waayey. Hadda markaan masjidka arrimihiisa ka shaqeeyey ayaa Ilaahay ii fududeeyey..

**Gabar ayaa tahriibka ku foolatay?..Yaa ka dhalinaya!!**

Nin kale oo isna na ag joogey, ayaa yiri, annaga waxaa noogu darrayd, annagoo doonta tahriibka saaran badweynta dhexdeeda, ayaa gabar uur lahaydi foolatay, wexeyna noqotay inaan annagu ka dhalino, si kastoo aanu wax u farsamayno, maadaama aan dumar kaloo wax yaqaanna joogin, dhakhtarna la hayn.. Waxaa laga yaabaa dadka qaar iney is weydiiyaan: oo gabadha 9 bilood joogta doonta tahriibka maxaa ku kalifey? Laakiin dabeecadda fekerka Soomaalida marka loo eego waa arrin caadiya, wax ka daran ayeynu ku keceynaa, kuwa iyada soo barakiciyey iyagoo berri amaan jooga kuwaas caqligoodu ama damiirkoodu iyaga xaggee jiraa? Sidaasoo ay tahay, waxaan aamin sanahay innagoo dabeecadahaas aadka u dhib badan qaarkood leh, ayeynu haddana leenahay kuwa aad u fiican oo aan la heli Karin. Balse mararka qaarkood, geesinimada, indha adayga iyo Badawnimadu waa sifooyin wax badani innogu suurtagaleen markii dhanka wanaagsan loo adeegsado, laakiin markii geesinimada iyo dhiiranaantu is dhex galaan, indha adayga iyo xishood la'aantuna isku qasmaan, Badawnimada asalka ahna aan ilbaxnima la marin, bilaayo iyo musiiboo dhan ayaa dheceysa waana mida inna haysata.. Waana masalo u baahan qoraal gaara in lagu falanqeeyo. Soomaaligu asal ahaan waa geesi, mana aqbalo wax karaamadiisa wax yeela, ciilna cadaab ayaa laga xigsadaa ayaa suugaantiisu dhigeysaa, laakiin waxyaaba aan lagu dhiiran ayuu geesinimo u maleeyaa oo ku ceeboobaa. Soomaaligu indha adayg ayaad moodaa inuu u dhashay, isagoo alif iyo ba' midna aan aqoon ayuu rabaa, Magaalada uu shalay soo galay inuu wada iibsado. Waa han iyo hammi fiican, laakiin meel aan indha adaygaas aqbali Karin markey gasho, wexey noqotaa xishood darro, daliil haddaad u baahantahayna Siyaasadda Soomaalida bal in yar eeg!!

**Switzerland**

Sheekadan markaan bilaabay ayaa nin maalin iisoo galay isna yiri, oo anigana sheekadayda maad qortid..Anoo nabad u aal, oo shaqa fiican haysta, biilkayga hela ayaa saxan saxada dhoofka Yurub sanka iga soo martay ilaa ay maskaxda I fariisatay. Maalintii dambe ayaan reerkii oo dhan gabagabeeyey. Khartuum ayaan loori kasoo saaray. Dhanka Saxaaraha maanan marin ee waxaan maray xagga Chad.. Ilmo iyo Xaasna waan wadaa. 7 beri kadib waxaan isa sii taagey Njamina.. Ilmihii ayaa meesha iiga xanuunsaday, safartii iyo dhibkeedii.. Daawo iyo waxbaan u

raadshey ayaamo ayaan joogey ilaa ilmuhu ii roonaadey, 2 dumara oo ila socdaana ii nasteen. Kadibna gaari kale ayaan ku boodney, ilaa iyo Niger..Kadibna Nimanka Afka duubta ee (Dawaariqda) la yiraahdo, ee Saxaaraa Al Kubraa Mara, ayaanu la heshiiney, koox ayaa nala ku soo qaaday, Waxaa la marayaa Saxaaraha weyn, kadibna Algeria ayaa dhinaca Liibiya xiga laga geliyaa.

Meeshii markii la tegey, waa nalaku daadshey, waxaa la yiri waa la lugeynayaa, dadka waxaa loogu sheegay, masaafo 20 km laakiin sidaa dhabtaa wexey ahayd 120 km!! Nimankii tahriibka wadey ayaa iga naxay oo kuwii ay nagu wareejiyeen ku yiri: War ninkaan Dumarka iyo Ilmaha wata meel cidlaa yaan looga tegin..Haddaad sidaa yeeshaan kala biximeyno.. Saxaarihii markii lugta loogu jeexay, waa lakala lumay, waana la kala tegey, labadii dumarka ahaa dhinac ayey iiga lumen, anigii iyo ilmihii yaraa ee aan dusha ku sideyna dhinac ayaanu u lunnay.. Iyadoo lakala quustay, iyaa dad igu soo noqdeen, oo ilaahay mar kale isu kaaya keenay.

**Xuduuda Liibiya.. Amaanta Macalimiin Soomaaliyeed**

Magaalada Xuduuda Liibiya markii aanu soo gaarney waxaanu helnay niman Soomaaliya oo aad u wanaagsan oo macalimiin meesha ka ah. Aad ayey noo soo dhoweyeen, guryey na geeyeen, ka dibna diyaarad ayey noo soo gooyeen iyagu kharashkeeda bixiyeen ilaa Darabulis na keentay.

Nimankaa macalimiintaa ee Soomaaliyeed khayr allaha siiyee, dhawr qof oo tahriibka dhinacaas Algeria kasoo galay ayaan ka maqlay, soo dhoweyntooda iyo marti soorkooda, iyo xitaa iney waraaqihii u soo sameeyaan ay wadada kusoo mari lahayeen…

***

**Tahriibka Suuriya ilaa Turkiya – Griigga**

Annagoo weli ku dhex jirna Socdaalka Geerida Soomaaliya ilaa yurub, wajiyadiisa kala duwan ee aan sheekadii dheerayd ku damaystireyno, waxaan la kulmay nin dhalin yara ah, oo isagoo soo maray dhinaca kale ee Tahriibka ugu weyn, waa dhanka Suuriya – Turkiga – Griigga. Tahriibka dhinacaan waxaa u badan dadka kasoo baxa xagga khaliijka, Sucuudiga ama Imaaraadka ama Qadar iyo Kuwait. Laakiin waxaa ugu badan dhanka Sucuudiga, halkaasoo ay joogaan Mukhalisiin ama Dullaaliin, nimanka carabtaa la shaqaysta, oo dadka kasoo daad gureeya Jidda ilaa Dimishiq kadibna waxaa la wareega Mukhalisiin kale oo lala heshiiyo sideey kuu geyn lahaayeen Turkiya Istanbuul, ama Izmiir toos laguu geeyo oo ah meesha looga gudbo dhanka Griigga, laakiin sida badan waxaa laga soo dhacaa Istanbuul oo lagala heshiiyo dadka kuu gudbinaya dhanka Griigga.

Saaxiibkeen wuxuu safarta kasoo bilaabay magaalada Jidda. waxaa dadka lagu soo saaraa iqaamooyin dad kale iyo baasabooradood. Kadibna muharibku markuu keeno Suuriya ayuu baasabooradii oo bixid ku taallo la noqdaa, kadibna dad cusub ayuu Soomaaliya kaga soo geliyaa, oo sidaas ayaa baasaboorkii gelid hadana loogu dhuftaa. Kuwa iqaamada iyo

Baasaboorka lehna waxbaa loo tuuraa. Sidaas ayaa kumanaan qof lagu daad guraynayaa sii wad iyo soo wad, waa hawsha ay dadka Soomaalidu koobka adduunka ku qaateen, haddii baddeda la galena buugaag sheekooyinkooda laga qori karo.

**Suuriya – Turkiga**




Dimishiq markaan imi waxaa lala xiriirayaa Mukhalisiinta tahriibka, dhanka Suuriya waa suuriyiin, dhanka Turkigana waa Turki..Laakiin ogow dadka dega magaalooyinka xuduuda Turkiga iyo Suuriya labada Luqaba si fiican ayey ugu hadlaan, waana carab iyo Turki isku jirta. Sida magaalooyinka Maardiin, Adana, iyo Iskandaroon. Wexeyna hadda xuduud ahaan raacsanyihiin dhanka Turkiga.

**Beeraha – Iskandaroon! Iyo Dumar Soconwaayey!**

Magaalada Iskandaroon ayaa habeenimo nala kasoo gudbiyey, waxaana lala balansanyahay fajarka ka hor meel beer ah oo dhanka Turkiga ah inaan kula kulanno qoladii noo qaadi lahayd xagga Istanbuul. Taasoo u baahan in la socdo masaafa dheer oo askarta la garab marayo, nin dal yaqaana ayaa idin wada. Ilaa 8 qof ayaan ahayn 2 dumara ayaa nala socdey, dhamaantaya waa inaanu ninkaa daba socono. Meesha uu cagta dhigana aanaan ka leexan waayo beero ayaanu

dhex mareynaa. Dhibaato wexey ka dhacday dumarkii nala socdey oo ahaa kuwa mudda dheer iska fadhiyey sucuudiga, oo socon kari waayey, oo markii xoogaa la socdaba fariisanaya.. Ninkii na hoggaaminayey waa nagu xanaaqey, wuxuu bilaabay xitaa inuu yiraahdo lugahaan ka garaacayaa qofkaan socon..Laakiin meeshii ayey habsadeen Islaamihii. Wexey noqotay in laga tago.. Waayo ninkaan wuxuu rabaa inta habeenimadaa inuu gudbo, oo meeshii lagu ballamay tago. Wuxuu yiri halkaan fariista, wuuna ka tegey, cabbaar ka dib, ayuu wuxuu u keenay 2 Faras, Dumarkii ayuu saaray, sidaas ayaanu meeshii lagu ballamay ku gaarney inkastoo aan daahnay oo waagii noo beryey, qoladii kale oo aad u caraysan ayaa ku qaylisay, kadibna 2 gaari ayey markiiba nagu aruursheen, wey nala carareen guri ayey na geeyeen, markaan waxaanu ku jirnaa gudaha Turkiya, wax nala hadlaaya, ma leh, haddaan qofku wax rabshad ah gelin. Tigidho Basaska Istanbuul u socda ayaa naloo soo gooyey, oo nala saaray. Sidaas ayaanu ku nimi Istanbuul.

**Turkiya – Jaziiradda Griigga**

Nimanka ka shaqeeya tahriibka ee dadka gudbiya waa Turki xiriir fiican la leh askarta xuduuda dhinaca Turkiga, ama horaba askar u ahaan jirey. Wexey kaga fiican yahay dhinaca Liibaya laba arrimood. Waa midda koowaade iyaga ayaa doonta yar kugu kaxaynaya ilaa ay ku geeyaan daanta kale, waana rag yaqaan hawsha ey qabanayaan. Midda labaadna masaafada u dhexeysa berriga turkiga iyo jaziiradda Griigga ee ugu dhow waa mid aad u yar oo doonto 20 daqiiqo ka badan maba qaadaneyso, madaxa ayeyba isku hayaan, waana isu muuqdaan.

Maalintii bixitaanka ahayd ayaa waxaa nala keenay magaalada Izmiir ee Turkiga, habeenimadii ayaa meel xeeb ah doon yar nalaga saaray, Nin xariifa ayuu ahaa ninka na wadey oo inuu askari ahaan jirey aan u malaynayo, waayo askarta Griigga xeebta Jaziiradda ayeey gaaf meerayaan, tooshash waaweynna wey ku ifinayaan badda, marka wuu u gooyey oo gudub ayuu u baxay kadibna waa soo noqday, si zig zaag ah ayuu u socdey ilaa uu xeebta Jaziiradda usoo duso, kadibna wuu nagu daadiyey, wuxuuna yiri waad Joogtaan Griigga, maca salaama, meeshiisi ayuu markiiba ku noqday..

**Khibrad Xumo.. iyo Is dhiibid..**

Jaziiraddu waa mid dalxiiska loo yimaado, dad kaloo badan ma deggana. Maalin walbana doon kuwa dalxiiska ah ama labo ayaa ka baxda.. Haddad dadkaa iska dhex gasho oo aan wax tilmaan gaara lagugu arag, ama aad isu ekaysiiso sahal ayaad u gudbi kartaa. Laakiin anaga Soomaalida waxaa naga dhaadhacsanayd inaad askarta isu dhiibto inaad qaxooti tahay..

Dabadeedna subixiiba laamiga weyn ayaanu marnay anagoo askari aanu isu dhiibno raadineyna..Wax yar ka dib ayaanu askari hellay!! Sow yaab maaha adigu inaad askarigii raadineyso si laguu qabto..Waa fikradda aanu haysaney.. Askarigii waxaanu ku niri, dad qaxootiya oo meeshan lagu soo tuuray ayaanu nahay.. Wuu na kexeeyey, saldhiga Booliska ayuu na geeyey, iyaguna markiiba, xabsiga ayey noo taxaabeen, halkaasoo 4 bilood oo xariga aanu kusoo liqnay markii maxkamad nala geeyey.. Farahana waa nalaga qaaday..

Waxaa naga fiicnaa qolyaha ciraaqiyiinta iyo carabta kale oo xeeladda yaqaaney..Markey jaziiradda soo galaan, dharkey bedeshaan, waa is qurxiyaan, dalxiis oo kale ayey iska dhigaan, si fudud ayey tigidh doonta ah u goostaan ilaa Athens, kadibna halkaas ayey dayuurad ka raacaan ilaa yurubta kale oo Sweden ama Norway ama Holland si sahlan isaga dhiibaan iyagoon faro iyo waxba Griig lagaga qaadin.

Xabsiga ka dib ayaa naloo soo gudbiyey Athens, halkaas ayaan kasoo gudbey anoo faruhu meel walba iga yaalaan, oo meelna aan waraaqa ka heli Karin.

**Romania-Hungary**

Saaxiibkan xagga bariga Yurub soo maray isagu wuxuu ku yimi dhulkaas ardaynimo, ka bacdina waa soo jeexay, xuduuda Ukraine iyo Romania iyo Hungary in saddex goor lagu qabtay, aakhirkiina uu soo moosay laakiin waxba aanu ka dheefin haddana uu doonayo inuu Soomaaliya dib ugu noqdo, uuna ka qoomamayey salfudaydki uu kusoo kicitimay.

**Cuba iyo Colombia!!**

Waxaa wada iyaduna tahriibka Soomaalidu maro ah Cuba iyo Colombia iyo dalalka Latin America iyo Mexico oo loo marayo Dalka Maraykanka. Nin fiican oo aan South Africa kula kulmay ayaan safaradii dambe waayey, markaan warsadayna waxaa laygu yiri: Ninkii dukaankii iyo wuxuu hayeyba waa xaraashtey, wuxuuna u jeexay Latin America si uu halkaas Maraykanka uga galo, hase ahaatee, meelahaas dhexe ayuu ku go'doomay, ama lagu xiray..

Maalin kalena anigoo Diyaaradda kasoo raacay Nairobi ayaa agtayda waxaa soo fariistay nin dhalinyara ah, wuxuu I tusay tigidhadiisa wuxuuna I warsaday diyaaradda transitka siduu ugu bedelanayo markii garoonka Dubai la gaaro. Waxaan arkay inuu wato tigidh ah: Nairobi-Dubai-Mosko-Havana!! Waxaan iri oo Cuba ayaad u socotaa adeer? Wuxuu yiri haa.. Haye..oo ma halkaasaa hadda line ka furmay? Haa adeer waa line cusub oo beryahaan furmay dad bandanna weli ma marin, wuxuu ku tegayaa Havana Business, hoteel ayaa loo qabtay, xoogaa yar ilaa 2000 Doolarna jeebkuu ku wataa..Tigidhku waa noqod..Fiisihii Cuba waa ugu dheggan yahay! Waxaan iri side kusoo baxday? Wuxuu yiri: Fiisaha waa ilaa 2000$ , Tigidhkuna waa in leeg, Jeebkana Jicsin in la mida, xaggaasna waa kharash kale marka maraykan loo gudbayo oo Kuubaanka u tahriibaya Miami ayaa la dhex gelayaa.. Waa lacag 8000 ilaa 10000 $. Waxaan ku iri: oo Adeer Suuqa Xaafadda Islii ee Nairobi dukaan cajaaib leh ayaad lacagtaas kaga furan lahayd, dhibkanna waad ka bad baadi lahayd maxaa dhacay? Wuxuu yiri: Adeer dhalinyaradu dhoofkaas ayey wada rabaan.. Waxaan ku iri: Laakiin sow ma ogid dhibaatooyin badan iney kaa horreeyaan, sow ma maqal mira guntiga ku jira, kuwa geed saaran looma daadsho. Wuxuu yiri: Annagana waa soo tijaabineynaa!!

**SOCDAALKII GEERIDA IYO QAAR KA MIDA DAREENKA DADKII AKHRIYEY**

Intaa haddaan ku dhaafo sheekooyinka gaagaaban ee Tahriibka waxaan jeclahay inaan wax yar halkan ku soo gudbiyo qaar ka mida fariimaha isoo gaarey oo dadku dareenkooda ku sheegay.

Nin warqad iiga soo qoray dalka Sweden wuxuu yiri: SHAEIK MAALMAHAN WAXAN LA SOCDAY SHEEKADA YARKA KU DHACDAY EE TAHRIIBKA UU KALA KULMAY,ANNA MID TAAS YARA DHAANTA AAA IGU DHACDAY LKN WAN KA WAQTI BADAN NAHAY YARKAAS.WAXAY IGU QAADATAY INAN YURUB IMAADO LABO SANO IYO SADDEX BIL DHIBAATO BADANA WAAN LA KULMAY HANA U QAADAN INAN MEEL FADHIYEY INTAAS EE WAA MAR AAN XABSI KASOO BAXO IYO MAR AAN GALO ALMUHIIM 2 SANO IYO 3 BIL KADIB AAN IMID YURUBTI AAN DHIBKAA USOO GALAYNA WALI DHIBKII WAXBA ISKAMA BADALIN INUU SIYAADO MAAHANE. waxan safarkayga bilaabay april-9-2008 waxaana ka bilaabay wadan kamid ah wadamada africa waxan isu soo maray illa 4 dal marka halkan aan jogo lagu daro waa 5 dal,waxa igu yaab badnaa inan xabsiyo ku jiray hal sano iyo bar kuna dhibtoday waxa kale igu dhib badnaa in lay qalo anigoo ku jiro xabisga cid i ogina aysan jirin qalitaankayga familkaygu ma ogeyn saalada aa lay saaray kadib marki lay qalana soco ayaa layiri gal qolka aad ku jirtay, layna diiday inaan xiriir haba yaraatee la sameeyo familkayga inkbadan 6 bilood, ti kale ee igu yaabka badnayd waa anoo badda ku jiray 2 maalin doon dulsaarna marki danbe allah iga badbaadiyey. lkn sababteed ciidamada badda ay laahayen oo na badbaadiyeen, WLH HA U QAADAN INAY TAHAY SHEEKO KHIYAALI AH OO AAN SAMAYNAYO LKN WAA QISO XANUUN BADAN OO IGU DHACDAY,

CIWAANKAYGA WA MIDKA AAN HADA MASSEGE KA KAAGA SOO DIRAYO WAXAN RABAA SHEEKADAYDA IN DHALINTU KU TUSAALE QAADATO))

**Nin walaalaha Jooga dalka Qadar wuxuu soo qoray:**

((Inaay qisadan runtahay oo aan loo baahnayn baaritaan badan waa wax jira. Shalay oo udanbaysay oo aan akhrinayay qaybtii 6aad ayaa waxaa ii soo galay nin aan saaxibo nahay oo walaalkiis bada libya iyo yurub u dhaxaysa lagu aasay- lagu tuuray maydkiisa. Waxan ku iri, qisadii walaalka inta aanu bada lagu aasin ma akhrinaysa? Inta ilma kusoo istaagtay ayuu igu yiri: madoonaya inaan dib uxasuusta qisadaas!))

Dr Abdullahi oo Professor ka ah Jaamacad Malaysia ku taal wuxuu dareenkiisa usoo gudbiyey sidan: ((Walaal barasho wanaagsan, Magacaygana waa C/llahi Cali Maxamed kana shaqeeya Malaysia, Jaamacada la yiraahdo Nottingham Malaysia Campus. Allah ajar ha kaa siiyo waxaan aqriyaa sheekadaa aad sida quruxda badan u soo bandhigtay oo ah Socdaalkii Geerida Soomaaliya ilaa Yurub . Ra’yi ahaan waxaan is dhihi lahaay in aad u diyaariso oo aad daabacada, dadkana loo qaybiyo, waa calool xumo, habeen dhowayd intaanan jiifan ayaan aqriyay waana jiifan waayay oo waa calool xumo sida aan u baa’banay. Mideeda kale qoraalki sii wad, waxaad ka mid tahay qaar fara ku tiris oo an aqriyo qoraaladooda, luqadi Soomaliga ay weli ku danbayso.Walaalkaa Dr. Abdullahi Ali Mohamed -School of Civil Engineering – University of Nottingham Malaysia Campus – Jalan Broga – Malaysia))

Maxamed Haaruun wuxuu kasoo qoray Sheffield, UK wuxuuna yiri: ((Waxan ka mid ahay gudiga masjidka Al-taqwah ee Sheffield, UK oo aad marar sii horaysay noogu timid. Waxan akhriyay sheeko aad ka qortay dadkaas Soomaaliyeed ee dhulkaas ku rafaadsan, gaar ahaan kuwooda soo mara meeshan aad u bixisay Socodka geerida, Somalia ilaa Europe. Sheekh Maxamedoow inagu hadaan Soomaali nahay wixii dhacayaa oo dhami way iska dhacaan uun ee cidina waxba

kama qorto, sidaas darteed ayaanay ku halaabaan qisooyin iyo waayo tiro badan oo dad badani ka faaiidaysan lahaa. Aad baan kaaga mahad celinayaa wakhtiga aad galisay qisadaas qoristeeda aadka u qurxoon eed soo ban dhigtay.))

Waxaan kusoo Gabagabeynayaa tacliiqaadka dareenka Khadar Cilmi oo isagu ka mida dadka Tahriibka wuxuuna iiga soo qoray Griigga wuxuuna yiri: ((Salaanta Islaamka ah kadib, Sheekh Mohamed Idris, Sheekheygiyow adeerow waxaan kamid ahay dhalinyarada tahriibka ah ilaa hadda, kuna sugan Dalka Greece caasimaddiisa Athens muddo 9bilood ah ayaan joogaa, waxaan haayaa sawiro caddeyn ah min Kenya, Syria, Turkey illlaa Greece.

Dhibaatooyin waxaan soo marnay talo iyo tusaale inbadan ayaan ka hayyaa, maadaama aad tahay qoraa kuxeel dheer tafaasiisha waxaan jeclaan lahaa inaan kuusoo diyaariyo xoogaay qormooyin intaan soo maray ah, wadatana Sawiro, adne aad tifaftirno insha allaah wixii kaaga suuga gala.)).

Intaasuna waa qayb ka mida dadka meela kala duwan dareenkooda iiga soo gudbiyey iyo talooyinkooda Ilaahay Ajar iyo Xasanaad haka siiyo, Waxaan ka cudur daaranayaa inta kale oo aanan soo gudbin oo aan meeshan lagu wada koobi Karin, laakiin tusaale aan u keenay, waxaan leeyahay dhamaan Jazakumullaahu khayran, Qiiradiina iyo dareenkiina Islaannimo, iyo Soomalinimo.



**Gunaanad: Cibrooyin & Casharo waaweyn**

Waxaan filayaa qisadan iyo kumanyaalka qiso ee la mida waxaa cibro iyo cashara noogu sugan lama koobi karo, waxaase muhiima in casharada iyo cibrooyinka lagu intifaaco, dhab ahaanna waxaana ku waana qaata dadka aqoonta leh, iimaanku uurka uga buuxo, caqliguna u caafimaad qabo.

Waxaa cibrooyinkaa ka mida, dalka iyo degganaantiisu qiimaha ay leedahay, sidaa darteed ayaa Rabbi Subxaanahu watacaalaa marar badan Qur'aanka adoomaha ugu mana sheegtaa (Nabad gelyada iyo nolosha wada socda oo dad dhulkooda ku haystaan)..

Waxaa ka mida cibrooyinka qofka dalkiisa iyo dadkiisa meel u dhaanta inaanu helayn, qurbuhuna xanuun badan yahay, sidaa darteed ayaaba shareecadu qofka dhul qurbaa jooga xukuno gaara siisay.. Dawladnimadu iney shey muhiima oo maslaxad guud ummaddoo dhan u ah ay tahay, sidaa darteedna marka la haystana lagu fara adaygo oo aan si fudud laysaga dumin, markii la waayana sida ugu fudud ee ugu dhaqsi badan loo unko, oo loo baxnaaniyo, taasoo maslaxadda qof walbaa ay ku jirto…

Waxaa ka mida cibrooyinka damaca aan daraasada ku dhisnayni dhibaatada uu leeyahay, oo qofku aanu isu miisaamayn waxa uu haysto iyo waxa ka maqan oo uu raadinayo, iyo wadaduu ku raadinayo..

Waxaa ka mida Qanaacadu iney tahay hibo Ilaahay baxsho oo aan la heli Karin, Sida xadiisku tilmaamay, taasoo ah qofku inuu ku qanco wixii Ilaahay qayb u siiyey dad iyo duunyo, hadduu wax kororsi doonana sharciga iyo caqliga aanu dhaafin.

Waxaa ka mida casharada dadka isku haya Soomaaliya taladeeda ee ku diriraya mid walbaana isla qumman yahay iney qaybta ugu weyn dembiga dadkaan qaxaya ee baaba'aya qaadayaan, waayo wexey sabab u yihiin dalkoodu inuu inuu degi waayo, dadkiisuna ku sugnaan waayo.

Ilaahay waxaan ka baryeynaa inuu Ummadda Muslimkaa guud ahaan, Gaar ahaanna Ummadda Soomaaliyeed dhibka ka qaado, Intooda Akhyaartaana Ilaahay talada ugu dhiibo, Ardaashana Ilaahay dhinac ka mariyo.

###
Dhammaad.

***

**Qoraagga:**




W/Q. Muxamad Idris Axmad
Email: hayaan@gmail.com

**Links:**

Linkiga qoraalka:

PDF: http://somalitalk.com/qiso/socdaal.pdf

HTML: http://somalitalk.com/tag/idris

**FAADIN/XUQUUQ: SOMALITALK.COM :**
- Qoraalkan waxaa xuquuqdiisa leh **Sheikh Muxamad Idris** oo qoray. Waxana uu kusoo baxay Shabakadda SomaliTalk.com oo asal ahaan loogu daabacay qaybo xiriir ah. Qoraalkan wax laguma dari karo, waxna lagama dhimi karo, waxna lagama bedeli karo ayadoo aan ogolaansho qoraal ah laga haysan qoraaga oo toos loogaala xiriiri karo Emailka: hayaan@gmail.com
- Wixii farsamo ahaan ku saabsan qoraalka waxaa lagala xiriiri karaa http://somalitalk.com/contact/

**Tixraac Sawirada:** Google Earth, Google Images, Wikipedia iyo SomaliTalk.com

© Xuquuqda Qoraalkani xafidan / SomaliTalk.com September 24, 2010.